BILE HASHI

DEYNABO



Copyright © Bile Hashi

No part of this publication may be reproduced, transcribed, stored in retrieval or translated into any language in any form by any means, without the writen permission of the author.

Design and Layout
Jenny Larsson

International Standard Book Number (ISBN)
© BILE HASHI
ISBN 91-631-4179-5
GÖTEBORG SWEDEN
Printed in Sweden

DEYNABO

Haasaawe qallafsan!

Have Sold More Than 10 thousand Copies in Europe, Africa and USA

Bile Hashi

Qoraagii buugii “Janno” iyo “Calaf”

www.bilehashi.se

Waxay ahayd maalin arbaco ah, Caad badan oo cirka ka sokooyey ayaa ka hortaagnaa qoraxda ifkeeda inuu soo gaaro dhulka, waxuuse qoraxda kulkeedu ahaa mid la dareemi karo, dhulka wuxuu soo tufayay uumi aanan ishu qaban karayn balse jirku dareemi karay. Kulka iyo xaraarada jirkeygu dareemayay duhurkaa arbacaad qoraxda kasokoow waxuu ka imanayay dabka ka shidnaa burjikada aan ag fadhiyey. Waxaan diyaarinayay qadadi reerka. Waxaa da'deydu ahayd lix iyo toban, waxaana ahaa da'dii sadexaad ee aabahay Iikar ay hooyadeey Seynabo u dhashay. Waxaa magaceeyga la yiraah Deynabo, waxaa iga weynaa gabar la yiraah Maano, iyaduse ma aysan nala degenayn, waxay la nooleyd

www.bilehashi.se

oo ay u shaqeeyn jirtay reero qani ah oo u baahday ciidamiso. Waxaa Maano ka weynaa wiil curadkeena ahaa oo magaciisa la yiraahdo Ibraahin, Aniga waxaa iga yaraa gabar layiraahdo Mulki oo yaraanta reerka ahayd.

Waxaa jikada anigoo kujira dhagaheyga soo gaaray barqadaa arbaco cod aanan dhageheygu aqoon, oo daashka ka imanayay. Waxaan istaagay derbiga jikada oo duleeladiisu badnaayeen maadaama jikadeenu ka dhisneyd ood iyo ulo, waxaan arkay nin iyo naag aanan hore u arag iyo hooyadeey oo daashka wada taagan. Waa ay isi salaameen, in xoogaa ah ayay iyagoo weli daashka taagan wada hadlayeen, inkastoo aanan markaa wada maqleynin waxay ku wada hadlayeen. Xaga jikada ayay usoo dhaqaaqeen, maadaama hooyadeey xagaa farta ugu soo fiiqday. Markiiba derbigii aan agtaagnaa ayaan ka booday oo u cararay xagii burjikada si aysan iigaran inaan derbiga deleeladiisa ka eegayay iyaga. Jikada albaabkeeda ayaa dibeda laga soo riixay, nus ayuu balaqmay, waxaa usoo horeeyey hooyadeey oo aan gartay lugaheeda iyo diracii ay xirneyd, isheydu waxay qabatay lugihi hooyadeey oo jikada soo galay.

- Deynabo!, ayay tiri markii ay labadeedi cagood jikada soo wada istaageen, indho kulul ayay igu soo

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

eegtay, sidi inay ileedahay, tus martida inaad shaqada jikada ku fiican tahay!., mindidi aan gacanta ku hayay ayaan miiski gaabnaa ee khudaartu ii saarnayd dul saaray, kor ayaan usoo istaagay, anoo gacmaha simaha ku masaxaya si gacmaha qoyaankoodu uusan iiga muuqan, safaleetigi madaxa ii saarnaa ayaan toosistay. Waxaa kulmay indhaheygi iyo indhihii martida, hoos ayaan eegay. Oo cod hooseeya kusalaamay martidi anigoo weli dhulka eegaya. Ma filanaynin marti, cidnana iima sheegin in marti maalintaa inoo imaneyso.

- Waatanaa Deynabo!. Ayay hooyadeey usheegtay ninkii iyo naagtii wada socday iyadoo u tilmaameysa.
- Waa gabar aad u fiican!, ayuu ninkii kala hormaray naagtii la socotay. Maxaad karineysaa? Ayuu iweeydiiyey.
- Sabaayad iyo suugo. Ayaan ujawaabay anigoo hooyadeey xageeda eegaya. Ma jecleyn iney jikada ku daahaan.
- Iska fadhiiso oo shaqadaada iska wado!. Ayay naagti tiri ereygeedi ugu horeeyey. Waan yeelay, oo gambarkeeygi ayaan fadhiistay, waxaan istusay inaan keligeey jikada joogo, waxaan qabsaday mindidi oo bilaabay inaan jarjaro barkii kale ee basashii aan hore u bilaabay inaan jarjaro intaanan codkooda daashka

www.bilehashi.se

ka maqal, dhinac ayaan isugu riixay basashi, dambiil i dhinac tiilay ayaan gacanta galiyey oo kasoo dhifsaday barbarooni cagaaran, anoo barbaroonigi gacanta bidix ku haya ayaan gacanti kale kusoo qabtay jalamad biyo iigu jireen, oo ku dhaqay barbaroobigi, kadibna miiski ayaan dul saaray oo jarjarkiisi bilaabay. Weli martidi jikada ayay joogaan, wey isoo eegayaan sidii xoolo shabaq ku dhex jira, wey taaganyihiin. Waxaan uurka ka nacayay inay i agtaagan yihiin, waxaan dhibsanayay aamusnaanta oo sidi cirbadi jirkeeyga u dureysay.

- Gambaro ma idiin keenaa? Ayaan weydiiyey anigoo weli jarjaraya barbaroonigi.
- Maya, maya ! waan taagnaaneynaa. Ayay martidi jawaabeen.

Waxaan dareemayay in gacmaheygu gariirayeen markaan hilibka dhaqayay, weli waxay indhaheygu eegayeen gacmaheyga iyo miiska alaabtu iisaarneyd. Hooyadeyna waxay dhinac taagan tahay martidi oo iyaguna aniga iyo shaqada aan qabanayo ku mashquulsanaa.
Waxyar ka dib ayaa naagti tiri: Meeqa sano ayay jirtaa ayaad tiri?. Su'aashu waxay kusocotay hooyadeey.
- 16 !.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Iskool ma lageeyey?
- Haa fasalka todobaad ayay kugaartay!. Ayay hooyadeeyna ujawaabtay iyadoo iskula qob weyn jawaabta ay siisay naagtii iyo ninkii wada socday.

Sintii uu culeyskeedu buuranayay ma ahee sintii kale ayay culeyski jirkeeda ku wareejisay naagti iyadoo weli taagan, oo isku qaloocisay xagii ninkii lasocday: Maxay kula tahay? Ayay su'aashay ninkii ay wada socdeen.
Madaxa ayaan inyar kor uga soo qaaday digsigi saliidu iigu karkareysay si aan wejigiisa u eego, gacmahiisu waxay u saarnaayeen xabadka, shaarbaha iyo garkiisa aanan timaha laheyn ayuu ku cayaarayay.
- Waxay iila ektahay gabar aad ufiican!. Ayuu ugu jawaabay.
- Waa tahay! Ayay naagtiina madaxa uga baaqday hooyadeey inay jikada dibadeeda u baxaan.

- Macsalaamo!. Ayuu ninkii oo labada dumar ka talaabo dambeeyey igu salaamay!.intuu xagi albaabka usii socday.

Markii aan codkooda ka gartay inay jikada ilinkeeda ka fog yihiin ayaan booday oo u cararay xagii darbigi duleelay. Waan eegay, waxaan arkay iyagoo gacanta

www.bilehashi.se

ka salaamaya hooyadeey iyo iyadoo u madax-ruxeysa sidi askari mid ka garaado sareeya hortaagan.

Markey hooyadeey albaabka hoosta kasoo xirtay oo usoo noqotay xagii daashka waxaan arkay in aysan xageyga usoo socon ee weli daashka taagan tahay. Cirka ayay eegtay, oo hadana talaabada uqaaday xagii qolka jiifka, halkaa oo aabahay ay ku ogeyd inuu joogo. Baryahaan dambeba siduu u curyaamay aabe ma jecleyn inuu qolkiisa kasoo baxo, ama inuu dad la kulmo. Intuusan kasoo dhicin dabaqa sadexaad ee sartii uu wax ka dhisayay wuxuu ahaa nin aad u bashaash ah, aadna u xarako jecel, casarki markuu shaqada kasoo noqdo wuu lebisan jiray oo banaanada kusoo fiidsan jiray. Hooyadeeyna waxay weydiin jirtay cida uu sidaan iskugu xarageeynayo.

- Ma maseyrsan tahay? Ayuu isna su'aal dib ugusoo celin jiray.

- Yaad ismooday, yaa fuundi xun wax kufalaya! Ayay iyaduna ku jawaabi jirtay, anigaa kugu qaldamoo fuundi guursadaye!…ayay qosol uga badin jirtay xifaaltanka.

Waxay ku jirtay qolki in cabaar ah, xitaa Mulki oo qolka ugu gashay waxay usoo direen inay jikada aado, intey ka wada hadlayaan labada waalid.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Casarkii maalintaas arbaco, markii ay qoraxdu qabowday, oo aan daashka fadhino ayay hooyo ii sharaxday martidii maalinkaa noo timid. Ma u baahneyn inay waxbadan ii sharaxdo maadaama aan ogaa xaalada reerkeena, aabe oo aanan reerka masruufi karayn wixii ka dambeeyey shilkii uu ku naafoobayba, Maano oo waxay kasoo hesho reerka ay u shaqeyso aanan reerka ku filneyn, Ibraahin oo warkiisaba aanan laheynin wuxuu reerka ukeeno dhaafe!. Waan iska ogaa in xoogeeyga reerku ubaahnaa.

- Waa reer aad u fiican!. Ayay hooyo iiga bilaawday hadalkeedi. Waa reer aad u qani ah, waxay nasiinayaan laba jibaar inta Maano ay ku shaqeeyso. Waxayna xitaa noo ogol yihiin in aad noo timaado jimce dhaaf oo nala joogto maalinkaa oo idil ilaa qoraxdu ka dhacdo. Adigoo maalinkaa mishaharkeedu kaa go'neyn!, Waa fasax aad u qalantid! Ayuu yiri Cilmi, odeyga reerka. Waxay degen yihiin xaafad aanan naga fogeyn oo saacad wax ka yar loo lugeeyo. Intaa ay hooyo ii amaaneyso shaqada cusub ee aan bilaabayo waxaan eegayaa indhaheeda, waxaa ii muuqda labadeeda indhoodoo waaweeyn oo salkoodu saaran yahay xuub ka madoow wejigeeda intiisa kale sidi ruux in badan aanan seexan. Waxaan ka nax-

www.bilehashi.se

ay rafaadka ka muuqda hooyo, siduu aabe shilka u galayba iyadaa hooyo iyo aabeba u noqotay reerka, hadana markaan aniga ka tago waxaa kusoo furanaya shaqadi aan aniga hayay oo ahayd, adeega, cunto karinta, dharka iyo aqalka nadaafadiisa. Mulki iyadu weli wey yar tahay, oo waa caruur afar jir ah, waxay qaban kartana waa wax caddidan. Hooyo ayaan u naxay darxumada haysata….

- Caruur maleeyihiin? Ayaan weydiiyey si aanan u caloolxumeyn oo aanan ugu sheegin waxa aan ku fekerayo iyo si aan u tuso inaan ogolahay waxwalboo ay xalkeena iyadu u aragto.
- Haa, sadex caruur ah ayay leeyihiin, waxaa kaloo la nool ninka hooyadiis, oo ku caawin doonta! Ayay ku dartay, si ay iigu sheegto in aanan wax dhib ah kala kulmi doonin.
- Goormey baxee? Ayay Mulki oo nala fadhisay weydiisay hooyo. Waan ogaa inay Mulki ka xun tahay inaan ka tago, waxaan ogaa markii ay Maano naga tagtay inay niyad xumaatay, habeenadiina qarwi jirtay, Maano waxay aniga iyo Mulkiba noo ahayd saaxiibteen, hooyadeen iyo walaasheen intaba, waxay fiidkii nooga sheekeyn jirtay sheekooyin cabsi ah, kuwo qosol ah, kuwo aan ku maadsano, waxay nooga sheekeyn jirtay waxa ay suuqa kusoo aragto ama

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

kusoo maqasho markey soo adeegeyso, galbihii wax-ay noo dabi jirtay timaha. Waxaan ogaa in markaan aniga baxayo ay Mulki la calool xumaan doonto maadaama ay iyada keliya caruurtii reerka kasoo hartay, in caruurnimadi ay ka bixi doonto, xitaa ayadoo weli caruur ah, shaqadii guriga wax ka qaban doonto, una xiisi doonto caruurta deriska iyo cayaartooda. Oo tolow ma cayaar bay wakhti u heli doontaa hadii iyada iyo hooyo la iskaga tagey oo aabana wax walba caawinaad ugu baahan yahay?, xitaa haduu suuliga tagayo.

- Beri subax! Ayay hooyo tiri, beri subax aroorti ayay ku sugayaan.
- Beri subax? Ayaan su'aal ku celiyey hooyo, codkeygoo uu ka muuqdo cabsi iyo xanaaq wada socda. Cabsi aan ka cabsanayay inaan reerkeena ka tagayo, iyo xanaaq aan ka xanaaqsanahay inaan reer shisheeye ah aan u shaqeeynayo reerkeygoo shaqo iiga baahan. Waxaan niyada ka jeclaa inaan gurigeena iska joogo, inaan sida caruurta ila qeyrka ah subixii iskool tago, inaan hooyadeey nasiiyo, ka nasiiyo shaqada guriga, iyo tan aabe oo curyaan derin yaala ah.
- Haa hooyo beri ayaan kula balamay. Waxay yiraahdeen si degdeg ah ayaan ugu baahanahay ciidamiso maadaama ay heystaan cunug bil kahor dhashay oo

www.bilehashi.se

shaqo badan u baahan.

*

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Subixii xigay waxaa hurdada iga toosiyey hooyo goor ay weli derisku hurdaan, keligeey ayay isoo kicisay. Quraac ayay ii diyaarisay, iyo boorso aan qaato. Waxay iigu riday boorsada labo dirac oo aan isku bedesho, goono, safaleeti ay iyadu lahayd, xabad saabuun ah oo nus laga isticmaalay, bac yar oo uu ku jiray suuf, hal kastuumo oo aan anigu lahaa oo ay iidhaqday xalay, qamaar madow oo isna ay iyada laheyd oo ay ducooyinka u qaadan jirtay.

Waxaan dhaqaajiyey iyadoo diiqi qeyladiisa aanan weli la maqal, wadada aan marayay waxay ahayd firaaqo aan wax dhaqaaqaya laheyn, jabaqduna wey yareyd, waxa keliya oo ay dhagaheygu maqlayeen waxay ahaayeen talaabadeyda iyo dhawaaqa ka imanayay shimbiraha dul saarnaa geedaha ka baxayay wadada labadeeda dhinac. Neef culus oo aan ilaa salka caloosha ka dareemay ayaan neefsaday oo dib usoo eegay gurigeena, waxaan isweeydiiyey sida nolosheydu isku bedeli doonto subaxaan wixii ka dambeeya. Ciidamiso!, Jaariyad!, Booyaas! Magac cusub ayaan yeeshay. Siduu magacaa cusub nolosheyda u

www.bilehashi.se

saameyn doonase ma ogeyn.

Waxaan socday ilaa qoraxdu iftiinkeeda dhulka soo wada gaaray, dhowr xaafadood ayaan sii dhex maray si aan u gaaro xaafadii ay degenaayeen reerka aan ka shaqo bilaabayo saaka. Degdeg ayaa igu jirtay inta-an usii lugeeynayay xaafada aan usocdey, maadaama balantu ahayd inaan la joogo marka ay hurdada kasoo toosaan, waa sidey hooyo ii sheegtaye.

Markaan hor imid gurigii reer Cilmi waxaa albaab-ki iga furay Islaan waayeel ah. Ma ciidamisadiyaa?. Ayay su'aal iga horkeentay iyadoo indhaheedu ka muuqdaan inaysan iskeed hurdada uga soo toosin ee ay kusoo toostay albaabka oo aan ku garaacay.

- Haa!. Ayaan ku jawaabay cod gaaban anigoo ku khasbaya qalbigeeyga in magacaan cusub ee ah "ci-idamiso" saaka mid la ii bixiyey uu yahay, -Haa waa aniga! Waan sugay intay iiga ogolaato inaan soo dhaafo albaabka.

- Wey wanaagsan tahay inaad balanta ku fiican tahay, reerku weli waa jiifaan, ninkii layiri reerka iyo guriga waardiyeyna waakaa kala yaala xagaa, ayay farta iigu fiiqday nin joodari ku jiifa meel derbi hoostiis ah oo guriga daashkiisa ah. Waxay i bartay waa waardiyihi

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

reerka, markuu quraacdana wuu baxaa, wuxuuna soo shaqo galaa salaada maqrib iyo cishaha inta udhaxeysa.

Islaanti way i hor kacday, aniguna waan daba socday anigoo boorsadeydi gacanta ku wata. Waxaan kasoo galnay ganjeelo, waxaan soo marnay daash cabirkiisu todobo talaabo in ah la'eg ah, kadib waxaa ka dhisnaa dhismihii guriga uu ku fadhiyey, gurigu wuxuu ka kooban laba dabaq, albaab kale ayaa horteena ahaa oo guriga la degen yahay laga galo, balse islaantu albaabkaa igama aysan gelin guriga, ee waxay ii hogaamisay albaabka gadaale oo jikada laga galo. Waxay tiri jikada dhinacan ayaa laga galaa, qolkaaguna wuu ku dhinac yaalaa. Intaan sii soconay waxay ii sheegtay in reerku dhowaan soo kici doonaan.

Guriga waxaa ku wareegsan derbi weyn. Afarta dhinac ee guriga iyo derbiga ku wareegsan waxaa u dhaxeeyey dhul toban talaabo weynin la'eg dhinac walba. Ganjeeladi aan kasoo galay dhinacey kutaalo ma ahee dhinaca kale ayay kutaalay jikada albaabkeeda. Markaan soo galnay jikada, waxay islaanta oo aan weli isku key sheegin magaceeda itiri baaldiga marada ku dadan ka qaad. Sidey itiri ayaan yeelay oo markaan maradi ka qaaday soo eegay xageedii, waxay

www.bilehashi.se

igu tiri dharkaa kabuuxa waa dhar dhaqitaan ubaahan, ee daashka lafadhiiso oo dhaq, baafna wuxuu yaalaa daashka oo waad arki doontaa, saabuun khaanadaa sare kala bax, farta ayay iigu fiiqday meel ka sareysay baaldigi aan dultaagnaa.

- Biyo? Ayaan weydiiyey. Biyo waxaad ka heleysaa meeshaad baafka ka heshid oo tubada biyaha hoosteeduu yaalaa baafku. Ayay iigu jawaabtay iyadoo kirli biyo ah makiinada cuntada lagu karsado dulsaaraysa.

Boorsadaan watay oo i agtaalay ayaan fiiriyey, oo weydiiyey inaan halkaa uga tagi karo iyo inay jirto meel kaga haboon.

- Ax, ayay tiri sidi inay iyada isla hadleyso, hadaba maan kusoo tuso!. Soo bax! Ayay itiri – waxaan horta kusoo tusayaa halkaad degi lahayde, waxaan kasoo baxnay jikadi waxay ii furtay qol jikada ku dhegenaa. Qolkaan waa qolkaadii! Ayay itiri iyadoo weli furaha aanan kala soo bixin albaabki.

Waxuu ahaa qol dhirirkiisu uu ka weynaa balaciisa, waxaa yaalay armaajo duug ah, badiilo iyo yaambo ku tiirsanaa halka labada derbi iskugu yimaadaan, waxaa kaloo dhinac yaalay baakad weyn oo ay ku jireen dhar duug ah oo dhar caruureed u badnaa, gee-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

sahaan eegay waxaan arkay inuusan qolku daaqad lahayn. Sariirta taalay geeska kale ee qolka oo ay labada derbi iskugu yimaadaan waxay ka sameysnayd bir, waxaana dulsaarnaa baakad kale oo buugaag ka buuxeen, buugaagta waxaa koray caaro oo aad mooday inay baakada dabool u noqotay. Waxaa qolka kasoo shiiraayay shiir sidi aqal inbadan aanan lagu nooleyn.

- Markaad dharka dhaqdo waxaa ku caawinaya waardiyaha intuusan bixin, oo kula hagaajin doona qolkan, hada boorsada dhigo oo shaqadaada qabso. Ayay i amartay islaanti iyadoo iisii horkaceysa xagii albaabka qolka looga baxayay. Waxaan uga leexday wadadi albaabka oo aan ka hortaagnaa oo hadana iyadi daba galay. Markaan qolka kasoo baxnay welina aanan jikadi iman waxay itustay xarig daaqada jikada iyo derbiga guriga ku wareegsanaa dhexdooda ka raaracay; xarigaa ayaad ku waraneysaa dharka markaad dhaqdid. Ayay itiri.

Intaan baafka ku fooraray oo dharka ka dhaqayay waxay indhaheygu ku mashquulsanaayeen hareerahayga. Wax waliba wey igu cusbaayeen, derbigan dheer ee guriga ku wareegsan, tubada biyaha ee aan dhinac fadhiyey, dhulkan dhagaxa ah ee gurigoo dhan ku goglan, dharka aan dhaqayay ayaan eegay oo

www.bilehashi.se

aan isiri bal qiyaas sida loo kala leeyahay, midwalba ruuxa lahaan kara. Shaarka waxaan qiyaasay inuu odeyga guriga lahaa, diraca ama Islaanta ama xaaska guriga in midood leedahay, Waxaan la yaabanaa daaqadaha waaweeyn ee guriga oo shabaqu ku dadan yahay iyo ubaxyada qurxoon ee ka hoos baxayay.

Markaan wada rugay dharkii oo biyo raaciyey waxaan bilaabay inaan warro, waxaan kor usoo dhifsaday dirac guduudan, biyihi ayaan ka maroojiyey oo xarigi ku warray, hadana shaar nin leeyahay ayaan soo dhifsaday oo maroojiyey, isna biyihi ayaan ka jafay oo warray, sidoo kale dharki intiisi kale, markaan dharki wada waray waxaan gartay inaysan kujirin dhar caruureed. Waan neefsaday oo kelyaha calaacalaha ku qabsaday anigoo taagan, markaan bogay waxaan sugayay in ruux iiyimaado, in islaanti ii timaado oo ii sheegto wixii kaloo aan qaban lahaa, balse waxaa dabaqa sare daaqadiisa iiga yeertay islaantii gurigeena shalay martida ku ahayd oo ninka la socotay. Wejigeeda ayaan gartay.

- Haye, ma timid? Ayay isu'aashay anigoo daashka taagan iyaduna qoorteeda kala soo baxday daaqada dabaqa sare.

- Haa Eedo!, ayaan kujawaabay anigoo kor u eegaya.

- Hadhoow baan kula hadli doonaa! Ayay itiri oo qoorta ka ceshatay daaqadi ay agtaagneyd.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Markaan muuqeedi waayay ayaan dhinacyadeeyda eegay, cidna ma joogin, waxaan isweeydiiyey in islaanti dabaqa sare igala hadlaysay in badan halkaa taagneeyd oo ifiirsaneysay iyo inkale. Waan ka cabsaday in iyada ama ruux kale meel aanan ujeedin iga eeganayo.

Inyar kadib waxaan dareemay in qoraxdu soo kululaatay, waxaan dareemay kuleyl, ma ogi ma shaqadi aan hayaybaa mise qoraxdii barqadaa oo kuleylkeedu yimid baa. Waxaa ii yimid Islaanti saaka albaabka iga furtay oo iisheegtay inay gurigoo idil isoo kala tuseyso maadaama hada reerkoo idil hurdada kasoo tooseen.

- Qolkaaga waad aragtay iyo jikada, intii kale ayaan kusoo kala tusaa ee nakeen ayay itiri, aniguna waan daba galay. Halkii aan dharka ku warray ayaan joognay markaa, waxaan soo dhex marnay jikadi, waxay jikada lahayd laba albaab, mid dibeda loo maro oo qolkeyga iyo daashka ku geeynaya iyo albaab kale oo guriga gudihiisa loo soo maro, kaas ayay ii hogaamisay islaanti, waxaan soo galnay qol weeyn oo kuraas isbuunyo ah yaalaan, dhinac kale waxaa yaalay, miis dheer oo kuraas badan hareeraha ka yaaleen, armaajo gaaban ayaa derbiga dhinac taalay,

www.bilehashi.se

oo ay ubax iyo sawiro dulsaarnaayeen.
- Halkani waa qolka fadhiga! Ayay itiri. Afartiisa dhinac qolka fadhiga, labo waxaa kuyaalay albaabo afar ah oo lababa dhinac kasoo kala jeeday oo qolal kale albaabadooda ahaa, mid waxay iigu sheegtay inuu yahay qolki Istar, mid waxey tiri martida ayaa jiifata, labada kalena ma eysan iisharaxin, labada dhinacoo kale ee isla qolka fadhiga mid jikada albaabkeeda ayaa loo maraa, dhinaca afaraadna wuxuu ku geeynayay albaab daashka guriga loo maro.

Waxay tiri qolkan nadaafintiisa ayaad subax walba shaqada ka bilaabaysaa, markaad quraacda diyaarisid, oo aadan weli qolalka jiifka nadaafintooda gaarin. Madaxa ayaan uruxay, oo tusay inaan adeecay amarkeeda.
Jarajaro qolkaa kutaalay ayay ii tilmaantay inaan usocono xaga dabaqa sare, markay sadex talaabo saaran tahay jaranjarti aniguna lugti koowaad jaranjarta lahelay ayay farta iigu fiiqday meel markaa gadaasheyda ahayd; Waxaan kaa hilmaamay – ayay tiri - in albaabka jaranjarta salkeeda ku dhegen uu yahay suuli. Markaan eegay xageey ii tilmaantayna hore ayay usii socotay, aniguna waan daba galay. Waxaan nimid dabaqi sare. Qolki koowaad ayay farta iigu fiiqday; qolkan waa qolki Cilmi iyo Sahro, reerka guriga. Madaxa

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ayaan uga tilmaamay inaan fahmay. Albaabki labaad ee qolkaa xigay ayay furtay oo iisheegtay inuu isna suuli kale yahay. Waxaan layaabay weyninka suuliga ay itustay, waxaa xitaa dhex yiilay miis ay dulsaaran yihiin, dhalooyin aan kuqiyaasay inay kujiraan alaabta dumarku isku carfiyo, waxaa kaloo dhex tiilay armaajo gaaban oo shukumaano laalaaban dulsaaran yihiin. Waaskada iyo miraayadaha suuliga anigoo lafajacsan ayay albaabki soo laabtay oo albaabki xigay ii sheegtay inuu yahay qolki Ismahaan. Weli ma arag Ismahaan. Waxaanse qiyaastay inay caruurta reerka tahay, qolki xigay ayay furtay oo iisheegtay inuu yahay qolka uu badanaa Cilmi wax ku akhristo markuu guriga joogo, waxaa la yiraah ”maktabada” ayay ii sharaxday erey markaa igu cusbaa. Waxuu ahaa qol balaciisa iyo dhirirkiisuba weynaayeen, waxaa qolka derbiyadiisa ku dhegenaa iskifaalooyin dhaadheer oo buugaag ku raseysan yihiin, gees qolka ah waxaa yaalay miis uu dulsaaran yahay teeb, waraaqo cadcad, dhowr qalin iyo feylal xiran, bartanka qolka waxaa yaalay afar kuraas oo gaagaaban midabkooduna yahay guduud oo miis dhexdoodu yaalo, dhulka waxaa ku goglanaa sujaayad ay ku sharaxan tahay midabo badan. Waxay iisheegtay islaanti i hogaaminaysay oo aan weli magaceeda iisheegin inaan ka taxadaro markaan qolkan nadiifinayo, inaanan daaqadiisa furin

www.bilehashi.se

markaan nadiifinayo, hadii kale – ayay tiri – waxaa soo galaya dabeyl ka kala daadineysa waraaqihiisa. Cilmi aad ayuu unacaa haduu waraaqihiisa meeshuu kudhaaftay uusan ugu iman. Ayay ii digtay.

Barqadi markay qoraxdu soo kululaatay, oo dharkii saaka aan dhaqay ay qalalayaan ayaan islaanti oo aan weli xasuusan inay magaceeda iisheegto aan anigu weydiiyey magaceeda. Qosol ayay la dhacday, maad ayay u arkeen su'aasheyda. Waxaan taagnaa jikada albaabkeeda, waxaan waayay meesha uu xawaajiga jikada kayaalo, iyada iyo xaaska guriga oo magaceeda la iigu sheegay Sahro ayaa qolka weyn ee fadhiga isla fadhiyey. Maxaa tiri? Ayay igu soo celisay islaanti iyada iyo Sahro oo fadhiga ku wada qoslaya.

- Eedo magacaa? ayaan hoos udhahay. Sahro oo qoslaysa ayaa tiri; Aay Faay! Ayaa ladhahaa. Islaanti weyneydna wey ka diiday oo tiri; run ayay u malayneysaa ee kaftanka dhaaf!. Iyadoo Sahro jilibka ka dharbaaxeysa.

- Eedo Qaali ayaa la idhahaa, iga raali ahow waxaan u maleynayay inaan saaka iskaa baray. Ayay iraali gelisay. Dib ayaan jikadi ugu noqday. Markaan hortaaganahay digsigi aan suugada ku karinayay ayaan xasuustay in aanan la iiga jawaabin waxaan ugu tagay, xawaajigi!, waxaan is iri raadso keligaa oo ha su'aa-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

lin hadana. Khaanad walbaan furay, iyo meel walboon is iri wuu ku jiraa. Waan waayay!. Inaan mar labaad u noqdo islaamihi ayaan ka maarmi waayay. Xagoodi ayaan udhaqaaqay, waxaase nasiib wanaag iga horyimid Qaali oo aan su'aalay meeshuu xawaajigu kujiro.

- Wuu dhamaaday miyaa?, ayay iweydiisay. Hadana markey jawaab iga weysay tiri bakhaarka ka doon, soo bax aan kusoo tusee, ma ogi inaan saaka kusoo tusaye, ayay tiri. Oo ka calaacashay in da'di ka daba timid oo waayahan dambe xusuusteedu sii xumaaneyso. Jikadi ayaan ka baxnay, qolkeygi ayaan sii dhinac marnay, qol ku dhegenaa keyga ayay furtay.

– Qolkaan waa bakhaar, Wixii jumlo loosoo iibiyo ayaa lagu keydiyaa, wixii jikada ka dhamaadana halkan ayay ku jiraan ayay ii sharaxday. Bakhaarka aad ayuu uga qaboobaa qolalka kale ee guriga, waxaa dhexyaalay, dhowr jawaan oo ay ku jiraan bariis, sokor, digir, bur, xawaaji, reexaan, caleen shaah, khaxwe iyo caleemo kaloo la qalajiyey, waxaa kaloo ku jiray baakado rasaysan oo ay ku jireen baastooyin kala duwan, makarooni, fiino, garooso, baakado buskut iyo macmacaan kale oo qalalan. Waan la fajacay qolkaa waxa kujira!, waxaan niyada iska su'aalay hadii intaan reerkeeyga loo geeyn lahaa!. Tolow intee in wakhti la'eg ayay ku filnaan lahayd?. Waxaan soo

www.bilehashi.se

xasuustay marar badan oo aan kala dooran jirnay inaan caawa casheyno ama subixi quraacano!.

Ma ahayn in waalidkeey ahaa kuwo caajis ah, ma shaqeyste yaal ah, ama ka caqli yar dadka, aabahay wuxuu shaqeyn jiray aroorti ilaa qoraxdu ka dhacdso, hooyadeey wax aanan weel buuxin ayay kala dhaqaaleeyn jirtay hadana noloshoodu ma aysan u ogolaan inay guri weyn ka dhistaan, ama dhar aad u qurxbadan ku lebistaan, ama caruurtooda iskuulka ku hayaan ilaa ay ka dhameeyaan, sidaa darteed ayaan anigu maanta ula joogaa reer Cilmi oo ugu shaqeeyaa iyaga si aan reerkeena kaalmo ugu noqdo.

Anigoo weli fekirkeygi ku maqan ayay i amartay Qaali, inaan jikada kasoo qaado qasacad aan ku shubto xawaajiga iyo mida caleenta shaaha inaan iyadana hore ugu soo qaado iyaduba wey kaa dhamaan rabtaaye. Ayay iga daba keentay anigoo jikada xageeda usii socda.

Subixi xigay, waxaan islahaa anigaa reerka ugu soo hortoosay, balse waxaan jikada ugu imid Qaali, oo jikada qaxwe ku karineysa.
- Subax wanaagsan, maxaad ku barisay? Ayaan kusalaamay.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Bari san!, ayay ii jawaabtay oo ii sharaxday waxay iiga soo hortoostay, waxay tiri, laba midba waan kaaga soo hortoosay; waa midee markuu da'deyda ruuxu yahay hurdadaa saqda dhexe ka dhamaata, mida labaadna, waxaan islahaa Deynabo guriga wey ku cusub tahay oo in wax la kala tuso ayay ubaahan tahay maalmaha ugu horeeya, waxaan quraacda markuu reerku quraacdo saaka kuu wadayaa suuqa, waxaan kusoo kala barayaa dadkaan wax ka iibsano oo aan rukunka u nahay, waxaan kusoo tusayaa dukaanka xaafada oo kusoo barayaa Xaaji Muuse, oo ah ninka iska leh dukaanka xaafada, oo adeega guriga haduu kaa go'o isagaad utageysaa oo kasoo qaadaneysaa, xitaa hadii lacagtu kaa go'do buugiisuu ku qorayaa, oo bisha markey dhamaato ayaa deymahooda loo kala geeyaa.

Barqadii ayaan suuqa u dhaadhacnay, waxaan ku hormarnay kawaanka, waxay i bartay kawaanlihi hilibka iibinayay, oo tiri gabadhan iska baro, waa jaariyadeena cusube, hilibka hilib ugu fiican ayaad usoo jareysaa markey kuu timaado.
- Hilib laf iyo cadiin ah! Sow ma aha? Ayuu kaftan ahaan ninkii aniga isu'aalay isagoo qoslaya. Dhulka ayaan eegay anigoo hoosta uqoslaya.

www.bilehashi.se

Waxaan hadana cagta sii marinay Islaan caanaha iibisa, mida gaaska iibisa iyaguna waa la i baray, waan kasii gudubnay hadana mid khudaar miis ku dul iibineysa ayaa la ibaray.

Markaan in xoogaa ah suuqa dhex soconay ayay Qaali itiri ma kala xasuusaneysaa dadkii aan kusoo kala baray iyo meelaha ay suuqa ka kala fadhiyaan, mise maalinba midbaan kusoo baraa!.

- Maya waan soo kala xasuusanayaa!, ayaan usheegay, oo waliba u raaciyey, Eedo suuqan ayaan hooyadeeyba uga adeegi jiray, inkastoo aanan dadkaad i bartay rukunkooda aanan ahaan jirin.
- Oo yaad rukun u ahaydeen? Ayay is tiri ogow.
- Kan ugu qiimo jaban maalinkaas ayaan rukun u ahayn. Ayaan u jawaabay. Way qososhay!.
- Waatahay, arrinku markaa waa sahlan yahay!, ayay tiri markaa waxaan hore usii maraynaa dukaanka xaafada xitaa oo ku barayaa Xaaji Muuse oo ah ninka dukaanka iska leh, isaga iyo wiilkiisa ayaa dukaanka iibiya.

Markaan dukaanki nimid waxuu Xaajigu wax ka iibinayay labo gabdhood oo da'deyda ah, waan sugnay, markii doorkeeni lasoo gaaray, waxay tiri Qaali; Xaaji gabadhaan iska eeg!.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Maxaa dhacay ma anigaa la isiinayaa?, ayuu la xifaaltamay Qaali, oo aan anigu markaa dhinac taaganahay.

- Maya, Xaaji, Ragu iyagoo sii bololaya ayay wiilal ismoodaan!, ma odeygaagaan ayaa gabadhan u qalma! Ayay iyana u xifaaltan celisay. Hadana u sheegtay in aan ahay jaariyada cusub ee reer Cilmi, oo wixii aan kasoo doono uu buuga ku qoro.

- Nacam!, xaajiyo, laakiin sawirkeeda maad iidhaaftid xaajiyo! Si aan dadka uga garto markey ii timaado! Ayuu qosol ku macsalaameeyey Qaali oo albaabka kasii baxeysa.

- Wiilkeyga Macoow sow ma fiicna? Ayay ka wareysatay wiilkiisa.

- Haa, suuquu hada ku maqan yahay oo dukaankuu usoo adeegayaa maanta.

Markaan dukaanka kasoo baxnay waxaan soo marnay xaafada wadooyinkeeda, dad badan oo Qaali salaamayay waxay weydiinayeen meeshaan ka imid iyo ruuxaan ahay. Iyaduna way usheegeysay inaan Jaariyada cusub ee reer Cilmi ahay. Aniguna waxaan maskaxdeyda ku edbinayay magacaan cusub ee la ii bixiyey. Jaariyada cusub ee reer Cilmi!.

*

www.bilehashi.se

Maalmihii xigay, guriga waxaa iiga kordhayay maalinba wax cusub, reerkana sidoo kale, waxaan ogaaday in Qaali ay tahay Cilmi hooyadiis, waxaa galabtii sadexaad ee aan reerka u shaqeeynayay la i baray caruurta reerka, Istar oo ahayd currada Sahro waxay jirtay toban sano, Ismahaan oo ahayd curadi Sahro iyo Cilmi waxay iyaduna jirtay sadex sano, Ardo ayaa ugu yarayd reerka oo iyada da'deedu sanad aanan weli dhameyn. Waxaa iyada dhabta la iisaaray galabtii koowaad ee aan reerka u imid oo la iyiri dhalo caano kusii. Markii hore way iga ooysay, markaanse dhalada afka ugu qabtay way aamustay oo dhabteyda ayay ku dul gama'day.

Dharka aan dhaqo kuwa Ardo ayaa u badnaa, maadaama dharkeedu u baahnaayeen in maalin walba la dhaqo, mar ay isku xaarto, ama isku matagto, ama caano

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ku daataan ayay u dhaxeeyeen, aniguna sidaa ayaan u dhaqi jiray xilli kastoo wax sidaa ahi dhacaan.

Waxaa kusoo xigay dharka Ismahaan oo markey cayaarayso aanan aqoon in la iska ilaaliyo biyo dhul yaala, khad meel saaran, ama in cuntada afka lagu aadiyo markii la cunaayo, in dharka marka la'iska bedelo meel ku quman la dhigto. Reerka waxaan ku kala qiyaasan jiray sideey u kala wasakh badan yihiin.

Waxaan niyada ka nici jiray kan ugu dhar wasakheyn og!. Xitaa odayga reerka, Cilmi, wuxuu soo raacin jiray dharka la dhaqayo kuwo weli nadiif ah, Waxaa Qaali ii sheegtay inuu wiilkeedu yahay nin aad u xarako jecel. Waxaan soo xasuustay aabahay oo labada shaar uu leeyahay midna xirta mid intuu carfiyo armaajada ku huurin jiray. Niyada ayaan ka karhi jiray subixii markaan u imaado dhar sidii buur meel iigu tuuran oo dhaqitaan iga sugaya, shaarar, saraawiil, jaakado, goonooyin, diracyo, saakooyin, garbisaaro, gorgorado, rajabeetooyin, malqabado, shaash, guntiinooyin, nigisyo, sigisyo, dharkay xirtaan waxaa dheeraa kuwo ay sariiraha ku gogladaan sida go'yaal, foodaroorin, kubeertooyin, kuwo daaqadaha ugu xiran, kuwa miisaska ku goglan, istiraashootinka, shukumaanada. Qadada markaan dabka ka qaado, intaanan miiska u kala geyn, ayaan dharka biyo la sii dhigan jiray, markey qadeeyaana, inteey hurdayaan ayaan dharka iska

www.bilehashi.se

dhaqi jiray, mararka qaar waxay soo toosi jireen anigoo weli dharkii wada warrin, oo iweeydiin jireen in shaah iyo macmacaan lagu casariyeeyo diyaar yihiin. Intaan jikada iyo baafka ukala cararayo ayaan dhabar xanuun dareemi jiray, oomada aan dharka ku dhaqayoo gacmaha xuubkooda iga goosata. Sidoo kale fiidkii markaan feeraynayo dharkii aan galabta dhaqay waxaan dhibsan jiray feerada kulkeeda oo wejiga xuubkiisa iga murxin jirtay. Anigoo da'deydu aanan ka badneyn todobo iyo toban gacmaheygu waxay u ekaadeen sidi islaan lixdan jir ah.

Waxaan keligey isi su'aali jiray markaan habeenki sariirteyda imaado, tolow sidey nolosheyda ahaan lahayd hadii sidi Istar reerkan aan ka dhalan lahaa?, ama aan sida Sahro anigu ahaan lahaa xaaski Cilmi?,

Sahro waxay ahayd islaan aad u caajis badan , weligey ma aanan arag ruux ka hurdo jecel, weli intaan gurigeeda ku noolaa ma aanan arag subax ay hurdada kasoo toostay dhaqso, waxay soo toosi jirtay markaan suuqa ka imaado oo reerka usoo adeego, xitaa uma soo toosi jirin Ardo oo bilo jirtay, waxay ku dhaafi jirtay Qaali oo kasoo hoos qaadi jirtay subax walba. Qaali aad ayay ugu rooneyd caruurta ay ayeeyada u tahay, waxayna ugu jirtay booska hooyonimo.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Markey qadeyso Sahro waxay hadana ku noqon jirtay hurdo ilaa uu odaygeedu u kiciyo casariyo. Marar badan waan ka faa'ideysan jiray maadaama aan ogaa inaysan guriga waxa ka dhacaya aysan kala ogeyn. Waxay ku mashquuli jirtay taleefan inay ku sheekeysato, ma ogi cidda ay la sheekeysato, laakiin marwalba taleefanka ayay ku hadli jirtay, waxay ka sheekeysan jireen iyada iyo ruuxa taleefanka kula hadla dharkooda iyo intey tiro la 'eg yihiin, cadaradooda iyo magacyadooda, waxay ruuxaas u sharaxi jirtay kuraasteeda, sariiraheeda, armaajooyinkeeda iyo gurigeeda. Waxaan mar qiyaasay inay la sheekeeysato dumar kaloo sideeda u dhaqan ama la dabaq ah. Waxay isku mashquulin jirtay inay aflaan qolkeeda ku daawato. Sidoo kale inay dharkeeda kala xisaabiso, inay muraayada horteeda saacado fadhido oo wejigeeda ka shaqeeyso. Waxaa laga yaabaa in codkeeygu u ekaado sidi inaan u carreysanahay ama ka hinaasanahay Sahro balse sidaa aan nolosheeda usoo sharaxay ayaa dhab aan dhalanteed ku jirin ah, wakhtigaan la noolaa iyo wixi aan ku arkay ayaa sidaa ah.

Qaali iyada waxay ahayd islaan aanan tabar sidaas ah lahayn, waxayse ahayd ruux ii roon, ama ruuxa kaliya oo reerka iga naxa markaan shaqo culus hayo. Waxay xitaa hoos iigu sheegi jirtay waxay isleedahay waan

www.bilehashi.se

ubaahanahay inaan ogaado, sida waxyaalaha ay ka Sahro ka carooto, si aan iskaga ilaaliyo, ama waxyaalaha caruurtu jecel yihiin, si aan u sasabto. Iyada ayaa ii kala sheegi jirtay waxa guriga looga kala baahan yahay. Xitaa waxay mar iga difaacday Sahro oo diidaneyd in lacagta lagu soo adeegayo todobaadkiba mar aniga la iidhiibo, waxay tiri, jaariyad lacag badan mar ma loo wada dhiibo!, alaabta qiimaha lehna meel ay arki karto lama dhigto!. Qaalina iyadoo aniga i difaaceysa ayay kutiri, hadii aad adiga shaqada gurigaaga ka adagtay Cilmi ciidamiso ma keeneen!, Sahro aad ayay hadalkaa uga carootay, iyada iyo Qaalina maalmo badan ayay kala aamusnaayeen.

Maalmihii dambe aniga ayaa lacagta masruufka la iidhiibi jiray, aniguna waxaan isku taxluujin jiray inaan xaga reerka ka yeesho maamuus iyo aamin. Waxaan kala bartay adeega suuqa, dukaanka xaafada, farmashiyaha, gaaslaha, meel walboo looga baahdo wax aniga ayay igu aamini jirtay Qaali.

*

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Cilmi oo ahaa odayga reerka mar qudha ayaan-ba is aragnay labadii todobaad ee aan guriga joogay, waa nin howlo aduun ku mashquulsan ma ogi waxa uu ka shaqeeyee waxuu ka shaqeyn jiray wax udiiday inuu caruurtiisa iyo reerkiisa la qeybsado xilliga reeruhu wada qeybsadaan, waxuu iman jiray xilli dambe habeenadii, aroortina wuu kalihi jiray. Maalintii koowaad ee gurigiisa ku kulanay waxaan isaga hornimid jaranjarta aqalka wuxuu usoo dhaad-hacayay qeybta hoose ee guriga aniguna waxaan usii socday qolalka sare ee guriga si aan usoo nadaafiyo, waxay ahayd weli arooryo, reerka badankiisuna wada hurdaan. Wuxuu istaagay jaranjarti markuu i arkay, isagoon erey i oran ayuu jaranjarta ugu sareysa is-ta-agay oo igu sugay ilaa intaan ka arkayo in ruux taagan yahay korkeyga. Markaan usoo dhawaaday halkuu jaranjarta ka taagnaa waan naxay oo baaldigi iyo

www.bilehashi.se

istiraashadi aan gacanta kuwatay ayaan tuuri gaaray, wuu ii dhoolacadeeyey oo subax wanaagsan iyo maxaad ku barisay ayuu igu salaamay!. Hortaada waa inaad eegtaa markaad socotid, hadii kale god ayaa lagaa raadinayaa dhowaan! Ayuu ii digey isagoo wadadi ii baneynaya. Aniguse meesheydi kama dhaqaaqin ee isagaan sugay intuu kasoo dego.

- Guriga ma lagu soo kala baray? Ayuu hadana su'aal iweydiiyey.
- Haa Adeer! Ayaan iri anigoo hoos eegaya.
- Qaali iyo Sahro si fiican ma kuu soo dhaweeyeen?
- Haa!

-Waatahay! Ayuu yiri isagoo wadadi ii baneynaya marlabaad, oo ii raaciyey; markaa uma baahni inaan kuu welwelo!.

- Maanta waa inaad farmashiyaha kasoo iibiso dawada qufaca, xalay oo idil ayay Ardo qufac lasoo jeedee!.
- Waa tahay Adeer!.

Kulankeenaa maalinkaas iyo kulankii uu guriga hooyadey igu arkay oo kaliya ayaan is aragnay aniga iyo ninka guriga.

Gabdhaha reerka Istar waxay mar waliba igu eegi jirtay indho sidi ruux wax tuhunsan inkastoo aysan erey

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

xun i oran hadana waxay sidaa ka muuqatay indhaheeda. Ismahaan iyadu way ka furfurneyd walaasheed iyo hooyadeedba inkastoo ay afar jir un ahayd, oo xitaa jikadeey iigu imaan jirtay oo markaan cuntada karinayo iigula sheekeysan jirtay, ama ay ii raaci jirtay suuqa markaan kasoo adeegayo, ama dukaanka xaafada wax uga baahdo. Way su'aalo badneyd; Meeqo sanaad jirtaa, aabe ma leedahay?, hooyo ma leedahay?, walaalo ma leedahay?, xagey degen yihiin?, maxaad ula joogi weysay iyaga?, anaga ilaa iyo intee ayaad nala joogeysaa? Maxaa dhacay?, ma nacday inaad lajoogto waalidkaa?, Aniguna jawaabta aan isleeyahay wey xamili kartaa ayaan ugu jawaabi jiray.

*

www.bilehashi.se

Waxaa lasoo gaaray maalin jimce waxaan markaan reerka u shaqeynayay labo todobad, maalinkaa jimcana waxaan lahaa fasax siduu heshiiskay waalidkeey lagaleen uu ahaa, fiidkii ayaa mushaharkeygi la isiiyey, waxaana subixii soo kacay kahor wakhtigaan soo kici jiray, qoraxda oo ifkeedu cirka dhinaciisa bari ka nuureysa ayaan soo gaaray aqalkeeni. Waxaan reerkeena ka maqnaa laba todobaad, weligeey kama dhixin habeena ka hor intaanan ciidamisada noqon.

Intaan gurigeena usoo socday wadadu iilama dheereyn siday iila dheereyd markaan usii socday guriga reer Cilmi. Markaan usoo dhawaaday aqalkii waalidkeey waxaan dareemay inaan sanado ka maqnaa, waan u xiisay. Intii ugu dambeysay wadada waan soo boodboodayay, waxaa wadada taagnaa wiilal iyo gabdho ila da' ahaa oo aan deris ahayn, oo igu soo kala orday markey i arkeen, waxay iga wareysteen xaafa-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

da aan shaqada ka bilaabay, jawaabo gaaban ayaan wada siiyey jawaabaheyga qaar hore ayay kuwo kale uga maqleen.
Xaafada aan magaalada ka degeneyn waxaa marar badan dhici jirtay in caruurtu iyagoo aanan weli iskuulka dhameysan ay meel ka shaqo bilaabi jireen si ay waalidkood masruufka reerka kala qeyb qaataan, mid faryaamo shaqo ka hela, mid fuundi noqda, mid xamaali noqda, mid jaariyad noqota ama mid jidadka ama suuqa hooyadeed wax kula iibisa.

Waxaan iska soo furay albaabka gurigeena oo alwaax bilaa quful ah ka sameysnaa, waxaa iisoo carfay canjeero la dubayo, waxaa daashka fadhiyey aabahey oo sali ku tusbiixsanaya. Markaan salaamay waxaa codkeyga maqlay Mulki iyo hooyo oo jikada quraac ku diyaarinayay. Daashkeey usoo baxeen oo ii qaabileen sidi ruux dhoof kasoo noqday. Markiiba Mulki ayaa gacanta i jiiday oo ii waday qolka ay hada keligeed jiifato.

Gurigeenu wuxuu ka koobnaa laba qol oo alwaax laga dhisay iyo musqul iyo jikada oo derbi wareegsan un ahayd. Qol waxaa jiifan jiray aabe iyo hooyo, qolna caruurteena kale. Markaan soo weeynaanay waxaa qolkeena loo qeybiyey labo oo lagu kala xiray maro,

www.bilehashi.se

qeyb waxaa jiifan jiray Ibaraahin, qeybna sadexdeena gabdhood. Ibraahin iyo Maano markey shaqo tageen waxaa qolka degenaa aniga iyo Mulki. Midba mar siduu reerka uga guurayay waxaa hada kusoo haray guriga Mulki oo keliya. Ibraahim oo ahaa curradkeena ayaa ugu hor guuray oo wuxaa shaqo laga siiyey faryaamo uu lahaa aabahay saaxiibkii oo ku taalay magaalada uu aabahay ku dhashay oo dhowr maalmood gaari loogu socdo, aabahay saaxiibkiisaas oo maqlay inuu aabahay shil shaqada ku galay oo uu ku naafoobay, hal wiil ahna wiilal ka leeyahay wuu ka naxay aabahey oo ahaa saaxiibkiis wuxuuna ku caawiyey inuu u shaqaaleeyo wiilkiisa oo markaa qaangaaray. Waxaa hadana guuray Maano oo u shaqo bilaawday reer qani ah oo degen xaafadaha dadka qaniga ah degaan. Reerkaa uma ogoleyn wax fasax ah Maano in wax khaas ah ay dhacaan mooyee, sidi markii ayeeyadeey dhimatay oo lasoo fasaxay oo ay sadex cisho nala joogtay.

Hadana aniga ayaa guuray! Yaa og intaan u shaqeynayo reerkaa, intaan ka maqnaanayo hooyadeey oo hada tabarteedu sii liidanayso, iyo aabahey oo marwalba simanka iyo garbaha ka sheeganaya maadaama uusan weli la qabsan inuu dhulka ku siqo. Yaase og in reer Cilmi ay noqon doonaan kuwo i dhaqaaleeya

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

si aan u dhaqaaleeyo waalidkeey?.

_- Caruur maleeyihiin? Ayay su'aashi koowaad i su'aashay Mulki, waxaan soo xasuustay, maalinkii ay hooyadeey ii sharaxeysay inaan reer Cilmi u guuri doono, waxaan weydiiyey caruur ma leeyihiin!.
- Haa, waxay leeyihiin gabar adiga kula eg oo la yiraah Ismahaan, ayaan u sheegay Mulki anagoo la-badii sariirood ee qolka yaalay kala fadhina.

Waxaan ku fadhiyey sariirtii aan jiifan jiray habeen walba intaanan shaqo bilaabin kahor, waan u xiiisay sariirteyda!, oo Mulki oo weli su'aalo iweydiinaysa ayaan isku kala bixiyey. Waxaan uga sheekeeyey reerka aan ushaqeeyo qof qof, anigoo wada amaanaya shakhsiyadooda si aanan u calool xumeynin Mulki, waxaana ka gaabsaday inaan amaano aqalka iyo sida uu u egyahay si aysan ii ximin inaan guri sidaa u qurxoon aan ku noolahay.

Quraacdi markaan cunay, waxaan hooyo u raacay suuqa, waxaan dhinac marnay dadkii ay reer Cilmi wax ka iibsan jireen, wey na salaameen aniga iyo hooyo, hooyo ima aysan weydiinin dadkaa sidaan isku baranay, wey iska ogeyd sababta. Oo ileyn kan ayay wax ka gataan!, ama tanay wax ka iibsadaan!,

www.bilehashi.se

ayay dhaheysay markaan dhaafno miiskooda.

Markaan guriga kusoo noqonay, wey iidiidaneyd hooyo inaan qadada wax ka kariyo, waxay itiri waa inaad nasatid, waan ogahay inaad daalan tahay shaqo kalena beri ay ku sugeyso. Aniguna waan diidanaa sidaa oo waxaan lahaa aadigaa hooyo daalan oo labadii todobaad ee aan kaa maqnaa keligaa ayay shaqadii aan wada qaban jirnay kugu soo furatay. Gabagabadii waxaan isla qabanaynay shaqadi anagoo jikada ku sheekeysanayna. Waxay iga wareeysatay iyaduna halka guriga la iga dejiyey, iney i dhaqaaleeyaan. Sidoo kale hooyana sidi Mulki ayaan u sheegay intaan islahaa kuma calool xumaanayso.

- Hooyo wax waliba wey igu cusub yihiin, waana ku qanacsanahay! Ayaan u sheegay. Qol ayaa keligey la i siiyey oo guriga reerka ka baxsan, jikadana la derbi ah. Markey heshay jawaabihii su'aalaheeda waxay iyaduna iiga sheekeeysay wixii reerka iyo xaafada ka dhacay intaan ka maqnaa. Waxay ii sheegtay in caruurta deriska ah badankood calool xanuun ku dhacay oo beryahan dambe ay biyaha kasoo dhaansadaan ceel xaafad kale ah. Waxay kaloo xaalada reerka iiga sheegtay in Mulki ay dhowr maalmood aamusneyd oo diiday inay ruux la hadasho sidaan u tagay, waxeyse ka xuntahay inaad ka tagtay oo iyadu waa caruur oo ma garanayso in aad shaqo u baxday. Ayay hadana

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ii sharaxday.
Waa runteed oo waan fahmayay sababta ay u carootay Mulki oo aniguba markey Maano naga tagtay sidaas ayaan u caloolxumaaday oo uga cabsanayay iney noosoo noqon weyso.

Aabe isaga waxba igama su'aalin, sidiisi ayuuna qolkiisa ugu jiray oo uu u aamusnaa, berigii hore waxaan islahayn waxaa ka aamusiyey shilka balse hada waxaa isbedelay shakhsiyadiisi oo idil, wuxuu ku soo baxay ruux aamus iyo xanaaq dhow, ma ogi ma waxaa ku adag inuu ku sabro noloshiisan cusub ee uu curyaanka yahay?.

Fiidki jimcaad markaan kasoo tagayay ayuu iyiri; aabe waad duceeysan tihiin!. Isagoo dermada daashka fadhiya. Waan ka naxay!, maadaama aan garadsanaa inuu ula jeedo mahdin uu noo mahdinayo aniga iyo labada kalee ushaqo tagay inay masruufaan reerka uu ka naafoobay.
- Aabe adigaa waalidkaaga baarri u ahaa, waa sidaas waxay owlaadaadu baarri kuugu yihiin ayaan u niyad dhisay. Anigoo dhabarka u salaaxaya.

*

www.bilehashi.se

Waxaan imid aqalkii reer Cilmi, goor fiid ah dayaxuna ifkiisa wada buuxo, markiiba waxaan galay inaan wax ka caawiyo Qaali iyo Istar oo jikada kuwada jiray. Ayeeyada waxay dubeysay malawax, gabadhuna wey dhinac tagneeyd oo weelal ayay u dhaqeysay. Istar markey aragtay muuqeyga ayay lasoo booday istiraasho dhinactiilay oo bilawday inay gacmaha masaxato. Waan gartay inay ileedahay adigaa shaqadan mushahar ku qaatee qabso!. Anagoon erey is-oran ayaan booska kala bedelanay oo halkeey taagneyd ayaan howshii ka waday, oo alaab dhaqidi bilaabay. Ayeeyada ayaa reerka iga wareysatay iyo inaan mushaharkii la isiiyey aan hooyadeey u wada geeyey iyo inkale.

- Waan ugeeyey waadna ku mahadsan tihiin!. Ayaan ku iri.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Adaa xoogaaga maashay! Ee waxba ha nagu mahadcelin!

Maadaama ay kala fogaayeen labada xaafad tan reerkeena iyo tan reerka aan ushaqeeyo, wadadaa dheerna aan usoo lugeeyey, aad ayaan u daalnaa, Waxuu jirkeeygu rabay inuu sariirta tagoo seexdo, markaan cashadi ukala geeyey Sahro iyo gabdhaheeda oo dabaqa hoose joogay, hadana Cilmi oo dabaqa sare qolka uu wax ku akhristo jooga. Ayaan qolkeygi tagay.
Waxuu ahaa mugdi, waxaan isiri nalka shid, wuuse ii shidmi waayay. Aad ayaan uga cabsanayay mugdiga!, waxaanse kasii cabsanayay inaan Sahro iyo Qaali weydiiyo caawinaad. Waxaan ka cabsanayay inay igu xanaaqaan, Waxaan soo hor istaagay qolkeygi oo jikada la derbi ahaa. Markaan in xoogaa ah dibeda taagnaa ayaa waxaa igu soo dhacay inaan waardiyaha raadiyo haduu joogo daashka oo weydiisto inuu nalka ii bedelo maadaama aan tuhunsanaa inuu nalka gubtay. Hadii kalena uu iga eego in qolka aanan wax khatar ah ku jirin.

Intaanan gaarin waardiyihi ayaan cod ka maqlay dusheeyda, wuxuu ahaa cod rageed oo iiyeeraya. Kor markaan eegay waxaan gartay Cilmi, oo qoorta kala soo baxay qolka uu wax ku akhristo, oo ay Qaali iigu

www.bilehashi.se

sheegtay ”maktabada” oo ka sareeyey qolkeeyga.

- Maxaad lasoo jeedaa Deynabo?

- Waxba! Ayaan iri, hadana isgartay inaysan jawaab fiican ahayn – qolka ayaa iga mugdi ah! Ayaan cod dacwo ka muuqato ugu sheegay.

- Oo maad nalka shidatid?

- Ma shidmayo nalka!.

- Isug waxyar! ayuu i yiri, sidii ruux aanan fahmin waxaan ulajeedo.

Dhowr daqiiqo kadib ayuu ii yimid, oo qolka iyo nalka wax iga su’aalay. Wuu igu qoslay markaan usheegay inaan mugdiga ka cabsanayo, meeshuu kayimid ayuu ku noqday, markuu iiyimid markii labaadna wuxuu ii keenay toosh, wuxuu ila galay qolki, kursi ayuu ku dul istaagay oo eegay nalkii aniguna tooshka ayaan u hayay.

- Shid hada!, ayuu iyiri. Waan shiday, laakiin qolku weli waa mugdi.

- Dhinaca kale u shid!, Waan shiday welina qolki waa mugdi.

- Nalkaa guban!, ayuu yiri oo dibeda ayuu u baxay, inyar dabadeed waxaa iisoo noqday waardiyihii oo nal gacanta ku wata. Waxaan isna tooshki ugu iftiimiyey halkuu nalku kasoo laalaaday, isna kursigi ayuu ku dul istaagay oo nalkii ii bedelay. Qolkii ayaa wada ifay markaan riixay halka laga shido. Habeenkaa

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

waxaan xasuustaa inaan nalka oo ii shidan ku seexday.

Intaanan gam'in waxaan ku fekerayay sida uu Cilmi uga duwan yahay xaaskiisa, sida uu dhowrka jeer iigu soo noqday si uu ii caawiyo, siduu usoo amray waardiyaha inuu nalka ii bedelo. Dabcan isagaa ii bedeli lahaa balse ma ogeyn halka nalalka keydka ah la dhigo.

Kulankeenii afaraad waxaan guriga ka shaqeynayay bil iyo xoogaa. Waxay ahayd habeen mar aan cabitaan ugu geeyey qolka maktabada oo uu inta badan keligii ku jiri jiray markuu shaqada ka yimaado, ma ogoleyn in cid ugu soo gasho qolkaas amar la'aan. Aniga waxaan u heystay fasax inaan galo, marka aan isaga cabitaan uusoo dalbaday ugu geeynayo, ama mar aan kasoo nadaafinayo. Wuxuu iisoo faray Qaali inaan cabitaan kor ugu keeno, waxay ahayd xilli dambe oo Sahro iyo caruurteeda jiifteen, waxaan kariyey shaah qorfo iyo heyl leh oo aan ugu shubay tarmuus, oo intaan laba kooboo nadiif ah oo mid maran yahay midna cadeys ku jiro saxan balaaran usaaray ayaan u qaaday dabaqii sare. Intaanan gargaraacin albaabki ayuu iga furay, waxaan filayaa inuu talaabadeyda maqlayay maadaama reerkoo idil wada hurdeen oo

www.bilehashi.se

gurigu shib ahaa, ama inuu gartay inaan labada gacmoodba wax kusido oo aysan ii firaaqo ahayn gacan aan albaab ku garaaco.
- Soo dhaaf!, ayuu iyiri isagoo albaabkii ii balaqaya.

Waan soo dhaafay. Wuxuu ii tilmaamay kuraas afar ahaa oo isku leexsan oo miis dhexdoodu yaalo, xagii ayaan udhaqaaqay, wuu i eegayay intaan shaaha ka dhigayay miiski uu ii tilmaamay.
- Fadhiiso! Ayuu i yiri. Waan naxay! Dhowr seken gudahood ayaan isku weydiiyey waxaan khalad sameeyey, waxaan ka cabsaday in Istar war xun iga sheegtay, waxaan qiyaastay anigoo la iga buriyey shaqada oo u noqday reerkeeni, aabahey oo igu ooynaya, hooyadeey oo ileh hada maxaan masruufanaa?.
- Maxaan sameeyey?. Ayaan weydiiyey anigoo wejigeyga uu cabsida ka arki karo
- Maxaan sameeyey! Ayuu igu soo warceliyey isagoo wejiga qeybtiisa kore kaduudaya indhahana isku xiraya sidi ruux meel mugdi ah soo galay.

- Waxba ma adaan sameyn Deynabo, waxaan isiri oo kaliya isbarta maadaama aan aniga reerkaaga kaasoo watay, hadana aanan wax badan is arag sidaan gurigeyga kuu keenay. - Fadhiiso kursiga ayuu iyiri isa-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

goo farta iigu fiiqaya kursi kasoo horjeeda kuu isagu fadhiistay.
- Maxaad guriga ka qabataa? Bal iisheeg howlaha laguu dhiibay? ayuu iweydiiyey.

Markaan gartay in uusan eedeyn iisoo fadhiisinin kursiga waxaa igu dhashay welwel kale. Ma jecleyn inaan kusii daaho qolkaas aan keliga ku nahay aniga iyo isaga, waxaan islahaa ka waran hadii ay Sahro noogu soo gasho! maxey noo arki kartaa?, Ninkeedi iyo jaariyadi guriga oo habeen xilli dambe ah qol ku wada jira oo hadana keli ku yihiin hoostana albaabku ugu laaban yahay.
Codkeygu wuu jaraynayay wuuna hooseeyey markaan u usheegayay waxa aan qabto oo kooban si aan ugu dhakhsado qolkeygi oo u seexdo,

- Subixi ayaan soo toosaa, quraacda diyaariyaa, gurigaan nadiifiyaa, aniga quraacdaa, hadana dharka maalintaas dhaqitaanka u baahan dhaqaa, markaan intaa sameeyo waxaan aadaa suuqa oo kasoo adeegaa, waan imaadaa oo qado kariyaa, dabadeed casariyadaan sii diyaariyaa. Galabti alaabtoon dhaqo, dharkoon feereeyo, iyo wixii adeeg ahoo dukaamada looga baahdo ayaan soo adeegaa, fiidki cashada markaan kariyo, alaabtii wasakhowdayna dhaqo wax-

www.bilehashi.se

aan caruurta la hayaa Sahro, waxay dibeda uga baahatana uga doonaa.

- Intaan sheekeeynayo wuxuu lasocday dhaqdhaqaaqa bushimaheyga, indhihiisa waxaa ka muuqday naxariis iyo inuu sheekadeyda dhuuxayo.

Waan is hor fadhinay, waxaa un noo dhaxeeyey miiska cabitaanku saaran yahay. Nalka qolka ka shidan wuxuu iftiinkiisu ubadnaa xagiisa, waxaan marmar kor usoo qaadayay indhaheyga oo inta badan eegayay miiska aan shaaha saaray.

- Aabahaa siduu caafimaadkiisu ahaa markaad soo booqatay? Ayuu su'aal lama filaan ah iisoo dhex geliyey.

- Wuu fiicnaa! Ayaan ujawaabay anigoo markaan si buuxda wejigiisa u wada eegaya oo la yaaban inuu reerkeena iga wareystay.

- Hooyadaa waxay iisheegtay inuu niyadjabsan yahay wixii shilka ka dambeeyey. Laakiin waxaan islahaa bal ka wareyso siduu caafimaadkiisu noqday. ayuu ii sharaxay sababtuu ii su'aalay reerkeena markuu arkay in su'aashu lama filaan igu noqotay.

- Wuu iska fiicnaa!, ayaan jawaab gaaban siiyey.

- Okey Deynabo waad ku mahadsan tahay shaahaagu, aad ayuu u macaan yahay. ayuu iyiri, isagoo jilbaha calaacalaha saaranaya si uu ii tuso in sheekadeenu dhamaatay, hadii ay jiraan wax aad ka tabanayso

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

reerkeyga ama aad isleedahay waan kaa caawin karaa aniga iila imow!. Ayuu igu sii sagootiyey markuu albaabka ii balaqay si aan uga baxo.
Codkiisu wuu dheeraa wuxuuna ahaa faseex, kana duwanaa codkeeyga aad mooday sidi tuug hoos u hadlaya, waxay intaa igu abuureen kalsooni, oo hadii uu wax kale damacsan yahay ama i shirqoolayo hoos ayuu u hadli lahaa.

Markaan qolkeyga habeenkaa imid in badan ayaan ka fekeray kulankeenaa, qalbiga ayaan ka jecleystay inuu nin naxariis leh yahay, oo xitaa nafteyda dhaafee xitaa wax iga weydiiyey reerkeena iyo aabahay caafimaadkiisa oo aan marwaliba u welweli jiray.

Dhowr maalmoodoo kale ayaa laga soo wareegay, adeegna igama uusan soo dalban, waxaa cabitaankiisa fiidki u geyn jirtay Istar inta aysan seexan, waan uxiisay kulankeenaa, waxaan ku jeclaa inuu iwareysan jiray. Xaaladeyda gurigiisa iyo tan reerkuu iga soo watayba, waa magacuu isaga reerkeeyga ula baxaye; reerka uu iga soo watay!.
Cilmi hadii laga saaro waxaa kaloo reerka ila sheekeysan jiray Qaali iyo Ismahaan, Qaali waxay ii dhaqaaleyn jirtay sidii caruurteedoo kale. Inta aanan weydiinin waxaan ubaahdo oo howsha guriga ah

www.bilehashi.se

iyadaa igala hormari jirtay inay iisheegto oo ii sharaxdo haday isleedahay ma taqaan, aad ayaan kalsooni ugu qabay iyadana oo kama baqi jirin inaan su'aalo ama aan ku iraahdo sidee loo sameeyaa wixii aanan aqoon, xiriir fiican ayaan yeelanay ilaa aan markii dambe bilaabay inaan "ayeeyo" ugu yeero sida caruurta gurigaba ay ugu yeeraan.

Ismahaan aad ayay ii jecleyd waxay i xasuusin jirtay walaasheey Mulki oo iyada la da'ahayd, berigi hore wey su'aalo badneyd oo inay wax walba iga ogaato ayay jecleyd markii dambase waxay igu jecleyd timaha oo aan u tidci jiray oo markaan aniga u tidcayo ma ooyi jirin mana qeylin jirin, waxay kaloo igu jecleyd sheekooyinka aan u sheegi jiray, iyo cayaaraha aan cayaarsiiyo markaan firaaqada ahay, waxaan kaloo u kaxeyn jiray meelaha aan kasoo adeego – taa oo ay jecleyd - sidi dukaankoo ii raaci jirtay ama suuqa markaan kasoo adeegayo hadii Qaali ama hooyadeed u ogolaadaan.

Maalin ay Ismahaan suuqa ii raacday waxay igala soo adeegtay kawaanlaha oo kula kaftamay "Oo cunugtu indha yaryaraa?"..hadana intuu mindiduu gacanta ku hayay geliyey sac madaxiis oo miiska usaarnaa ayuu kasoo saaray ishi saca, oo kuyiri indhaha makuu bedelaa!.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Wey ku qososhay waxbadan ilaa dad badan ay qosolkeeda kusoo jeesteen!, markaan kawaanliha kasoo taga isniri oo gadaasheena soo eegnay dadkii qoslayay ayaa waxaa isheyda ku dhacay Mulki oo dad badan noo dhaxeeyeen, wejigeeda waxaa ka muuqday inay ka xun tahay inaan gacanta hayo gabar kale oo iyada la da'ah. Waan u cararay xageedii, waxaan dhex jiiray dadkii noo dhaxeeyey sidi tuug wax soo dafay, markaan is iri waad taagan tahay halkaan ka arkay inay taagneyd waan waayay, geesaha ayaan eegay waxaa indhaheygu ku dhacayeen oo keliya wejiyo kale, in xoogaa ah markaan raadiyay waan ka quustay. Maalinkaa markaan guriga imid ilaa maalmo kaloo xigayba iyada ayaa niyadeyda ku jirtay sidaan ugu sharaxi lahaa inaan weli walaasheed ahay oo aanan cidkale booskeeda ka qaadan karin.

*

www.bilehashi.se

Waxaan jaariyad ahaa shan bilood markaan is baranay Macoow, oo ahaa wiil uu dhalay Xaaji Muuse oo dukaanka aan kasoo adeego ee xaafada lahaa. Wuxuu marwaliba igu salaami jiray xushmad iyo qadarin waxaan ogaa inuu i xiiseynayo, aniguse waxaan ahaa jaariyad xoriyadeeda iyo wakhtigeedaba loo taliyo.

- Naayaa sheeko habeen iyo haasaaw meeshan laguuma keenin! Ayay Sahro igu xanaaqday maalin uu Istar oo iskuul kasoo rawaxday soo faray fariin ah inaan habeenkaa dukaankooda hortiisa ku kulano, arin muhiim ah ayaan ka leeyahay ayuu u soo sheegay, iyaduna sidey usoo socotay ayay hooyadeed kutaabatay warki.

Anigoo aad u kulul ayaan la kulmay todobaad kadib oo usheegay inaanan rabin inuu mar dambe ama uu ila kulmo ama uu wax iisoo faro toona. Wuxuu isku

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

dayay inuu i maslaxeeyo, ana anigoo caraysan ayaan ku tuuray baaquli bur ah oo uu ii miisaamay isaga. Waxaa maqlay Qaali iyo Sahro wixii dhacay. Qaali ayaa barooratay oo tiri Xaajigi bey nagu ceebeysay!, Sahrana waxay tiri tani ilaah dabcigiyuu ka araday!, dabci dad lagula dhaqmo ma leh!.

Habeeno badan ayaan keligeey qolkeyga ku ooynayay dhacdadaa ka dib, oo diiday inaan la hadlo Qaali iyo Ismahaanba.

Dhacdadaa markii wakhti laga soo wareegay ayaan maalin anigoo suuqa kasoo adeegaya waxaan kasoo maqlay in xaafada waalidkeey degen yahiin la karantiilay oo cid kasoo bixi karta ama u tagi karta aysan jirin. Waxaa sidaa ku sheekeeysanayay labo islaamood oo safka kawaanlaha iga horeeyey oo iyaguna hilib iibsanayay, doorkeyga ayaan sugayay markaan sheekadooda maqlay. Waxay lahaayeen daacuun ayaa ka dilaacay oo waa fiican tahay in la karantiilo si aysan u fidin daacuunkooda.

- Daacuunkooda?, ma daacuunbaa dad iska leeyihiin? Ayaan hoosta iska iri.

Xaafada ay reerkeenu degenaayeen waxay ka mid ahayd xaafada dadka ugu tabarta yar magaalada ay degen yihiin, boosaskeeda xaafada iyo halka guryuhu

www.bilehashi.se

ka dhisan yihiin ma ahayn kuwo dowladu cabirtay ee reerba halkuu rabay ayuu ka dhistay, wadooyinkeeda waxaa buuxay wasakhda guryaha laga soo daadsho, dhulkeeduna wuu adkaa hadii god qashinka loo qodan lahaa, caruurteedu xaafada wey badnaayeen kuwo iskuul dhigtaana wey ku yaraayeen, haduu roob badan yimaado waxay biyuhu fadhiisan jireen wadooyinka dhuudhuuban ee guryaha kala dhexmara, guryaha dhismahoodu waxay iskugu dhawaayeen si aanan xaafadaha kale iskugu dhaweyn.

Waan ka naxay warkaa dhagaheyga soo gaaray., waxaana ka hubsaday inuu war jiro yahay markaan islaanta caanaha u imid. Anigoo hortaagan oo caano ka iibsanaya ayay i weydiisay in reerkeenu ka badbaaday daacuunka?

- Ma ogi ayaan iri oo ka cararay su'aasheeda!, mar rabin in hadalka reerkeena la igu soo qaado, waxaan ka cabsanayay in warxun aan ogaado anigoo ka fog iyaga. Guriga markaan imid waxaan gartay inaan soo hilmaamay gaaski la ii diray oo makiinada cuntada lagu kariyo lagu shidi lahaa. Waxaan uurka ka karhay inaan suuqa unoqdaa oo soo iibiyaa gaaski aan soo hilmaamay, ma ahayn inaan ka caajisanaa inaan suuqa unoqdo ama kuleylka qoraxda ka naxay balse waxaan diidanaa inaan arko islaantaan saaka su'aa-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

sheeda aan ka soo cararay, oo yaa gaaski ii doonaya hadii aanan anigu u noqon?.

Markaan guriga ka baxay suuqana aanan gaarin oo aan hormarayo dukaanka Xaajiga ayaa waxaan maqlay ruux ii yeeraya oo isoo daba socda, markaan gadaal u weecday waxaan arkay Macoow oo neeftuuraya.

- Waxaan kaa raadiyey meel walba Deynabo. Ayuu yiri isagoo weli neeftuuraya, waan ka baqay inaan ruux fariin kuusoo faro, waxaan maqlay in xaafada reerkaaga daacuun ka dilaacay, waxaan rabaa inaad ogaatid inaan ku howlanahay inaan la xiriiro reerkiina oo akhbaartooda kuu keeno.

- Waad ku mahadsan tahay! Ayaan ku iri, indhaheyga waxaa kusoo istaagay ilin, waxaan rabay inaan hab siiyo oo u mahdiyo, waxaanse ka baqay maalinta cad iyo qoraxda madaxeena ku dul aadan.

- Shalay waxaan arkay nin kasoo baxay xaafadiina oo markuu xuduudka soo dhaafay la qabtay oo la xiray, waxaan taagnaa xuduudka shaloo dhan oo askar badani ku taxnaayeen halka labada xaafad mida karantiilan iyo tan caafimaadka qabta iska gooyaan.

- Mida caafimaadka qabta?, ereygaa ayaa maskaxdeydu diiday!, ma tan aan anigu joogo ayuu ula jeedaa xaafada caafimaadka qabta? ma anigaa caafimaad

www.bilehashi.se

qaba waatan niyadeydu naxsan, jirkeeygu cabsi la jareynayo, waatan welwelku uurka iga jarjarayo ma dhinaca caafimaadka qabaan joogaa?. Ayaan isi su'aalay anigoon Macoow u sheegeynin waxa aan ku fekerayo.

- Dad badan oo dadkooda xaaladiisa inay ogaadaan uyimid ayaa meesha joogay, - ayuu hadalkii iisii waday - askartuse amar adag ayay qabeen oo cidna xuduudka ma u ogoleyn inuu dhaafo. Isagoo weli sheekadii ii wada ayay igu soo dhacday in adeeg la iga sugayo, qadadina aanan weli bilaabin kariskeedi. Suuqi ayaan u cararay isna wuu i wehliyey.

Waxay ahayd maalin khamiis ah marka aan karantiilka maqlayo, habeenkaas waxaa qolkeyga iigu timid Qaali oo mushaharkeygi isiisay, iina sheegtay fariin ay ka waday Sahro oo ahaa in aanan jimcadaan fasax ahayn!. Oo reerkeyga aanan aadi karin.
- Maxay sidaa u leedahay sow ma oga in aan jimco dhaaf fasax u leeyahay oo ay sidaa hooyadeey kula heshiisay?. Ayaan ku qeyliyey Qaali, jirkoo idil ayaa jiririco igu soo wada istaagtay.
- Maxaad sidaa ugu qeylinaysaa markaad ila hadleysid? Ayay is u'aashay Sahro markaan qolka ay fadhiday ugu tagay si aan iyada ugu dan sheegto.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Waxay tiri ma umaleyneynin inaad sidaa u caqli yar tahay, in xaafadiinu daacuun ka dilaacay oo uu daacuunku fido oo hadii aad tagto oo aad noo soo noqotid aad anaga nagu daaranaysid!, xitaa Ardo ayaa intaa fahmi karta! ayay tiri iyadoo fiirinaysa caruurta dhabta usaarnayd.

Dhacaan aan afkeyga ku jirin ayaan isiri laq, dhuunteyda oo qalalan ayaan ku margaday, waxaan eegay agagaarkeyna, waxaa na agtaagnaa oo kaliya Qaali oo na dhageysanaysa. Ciil iyo caloolxumo ayaan habeenkaa la seexday. Maalmihi xigay waxaan bilaabay inaan suugo cusbo la'aan ah kariyo, inaan dhar aan dhaqay dhaqitaan labaad u qaado, inaan shaah aan islahaa kari qaxwe uu noqday. Intaana waxaan dhabarka u dhiganayay dhaleeceynta Sahro.

- Maalintaan shaqaaleeyneyba anigu gabadhaan kama helin! Ayay horteyda ka dhihi jirtay. Debci la'aan iyo maskax la'aan ayay isku darsatay!, ayay sii wadi jirtay inay i dhaleeceyso iyadoo arkeysa in ilmadu indhaheyga ka qulquleyso.

Subixii dambe ayaa anigoo dhar ku dhaqaya daashka iiyimid waardiyihi guriga oo iisheegay in wiil magaciisa ku sheegay Macoow dibeda ii taagan yahay. Markiiba waan booday oo iloobay inay Sahro daaqa-

www.bilehashi.se

da sare iga arki karto, waxaan ugu tagay dibeda. Wuu islaamay, salaan kabadanse afkiisu wey ka soo bixi waayeen.

- Deynabo!….ayuu magaceyga iigu celceshay anigoo isaga hortaagan.

- Si kasta ayaan iskugu dayay!, ayuu ii sheegay isagoo wejigiisu ka muuqdo inuu ka xun yahay natiijo la'aanta oo uu iigu soo noqday.

- Waxba maleh!, naf walbaa wixii ilaah u qoray waxaan ahayn kuma dhacaan, wixii loo qorayna ma seegto!. Ayaan niyada ugu dhisay anigoo madaxa u salaaxaya isaguna uu dhulka eegayo. Hab ayaan isi siinay. Waa markii ugu horeysay oo jirkeenu sidaa dhow isugu soo dhawaado.

Ma sugin Macoow ee maalintii xigtay markii suuqa la ii diray ayaan aaday halkii xuduudka labada xaafad uu ahaa, waxaan imid xuduudki oo askar dhooban tahay siduu Macoow iigu sheegayna waxaa buuxay khalqi aad u badan wadada ay askartu xireen. Waxaan u tagay askari oo usheegay in reerkeeygu xaafada la karantiilay degen yihiin, aniguna aan xilli dheer ka maqnaa maadaama aan reero kale u shaqeeyo, inuu iisii daayo oo aan gudbo ayaan weydiistay.

- Hadii wax lagaa helayo waan kusii deynayaa ee fiidki halkan imow markuu dadku kala yaraado! Ayuu

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

iyiri isagoo luqunta ilaa lugaheyga indhaha marinaya oo ii dhoola cadeynaya. Waan gartay waxa la iga helayo inuusan lacag iyo laaluush midna ula jeedin. Waxaan ku dhuftay dambiishi aan adeega usoo qaatay oo ku hor ooyay, qoraxdu aad ayay u kululeyd xitaa wakhtiga oo barqo aheyd, waxaa markiiba igu soo kala booday laba askari oo isaga dhinac taagnaa oo garbaduub intay ii qabteen gaari meesha u taagnaa iila cararay. Waxay iigeeyeen nin ka garaado sareeyey labadooda.

- Maxay tahay ruuxan aad wadaan? Ayuu su'aalay.

Hadalki ayay igala hormareen waxay usheegeen inaan aflagaadeeyey markii ay iidiideen inaan ka gudbo xuduudka oo xitaa askari kale dhaawacay. Aniguna iyagoo weli garbaheyga ku dhegen, indhaheyguna ilmeynayaan ayaan u sheegay ninkii wuxuu askarigi igu yiri.

- Shuuush! Hoos u hadal ayuu iyiri markuu maqlay hadalkeygi isagoo ka cabsanaya in warkaas ay maqlaan dadka markiiba meesha jug kusoo yiri.

Waxaan ka baryay inaan xuduudka gudbo.

- Taa masoconayso ayuu ii sheegay kii garaadaha sareeyey oo anaguba amar uma qabno inaan ruux sii deyno, laakiin waxaan kuuyeeli karaa inaan diro askari akhbaartooda kuusoo ogaada. Ayuu igu yiri.

- Waad ku mahadsan tahay adeer! Ayaan iri anigoo

www.bilehashi.se

ku faraxsan fursadaa.

Meeshii dadku dhoobnaa ayaan ku sugay. Qoraxdu aad ayay u kululeyd waxaana lagu jiray xilliga kuleylaha bishiisa ugu kulul, kulka qoraxda waxaa laga dareemayay cagaha iyo maskaxda iyo inta u dhaxeysa. Qoraxdu marka ay ku dhacdo maskaxdeyda waxaan dareemayay wareer. Khalqigii badnaa ee meesha tuurnaa ayaa dhalinayay huur kaa oo igu dhalinayay inaan neefta la xarbiyo. Dadka meesha tuban aad ayay u badnaayeen, maadaama xaafada afarta iskgoys ee hareereeya la karantiilay oo askar ku wareegsanaayeen, waxaa dadku islahaa hadii dhinac laguu diido inaad ka gudubto armaa dhinaca kale laguu ogolaadaa, oo dadku waxuu u qulqulayay halka la islahaa fursad baa ka jirta, markii la isgaarsiiyey in aniga la ii cid diray si la iigu soo ogaado akhbaarta reerkeyga dad badan ayaa usoo qulqulay isgoyski aan akhbaar-teyda ku sugayay.

Kuwa islahaa kasoo baxsada daacuunka oo iyagu caafimaadka qabay waxaa daba ordayay askar oo markiiba dib ugu celinayay halkey kasoo carareen, Waxaan ka naxay markii islaan dhabarka caruur ku sidata oo islahayd soo baxso dib loogu celiyey waxay ku booysay in odaygeedi iyo laba ay dhashay dhin-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

teen oo ay doonayso inay nafteeda iyo tan caruurta ay dhabarka ku sido la baxsato. Yaase hadalkeeda dheg u dhigay?, Laba askari ayaa garbaha intay ka kala boobeen u qandaadiyey xagii daacuunka ka jiray.

Waxaan sugay in badan, welwelku wuu igu sii kordhayay daqiiqad walba, wadnaheyguna wuxuu ku garaacmayay xawaaro aad u sareeya. Waxaan ka welwelayayoo kale Sahro iyo adeegii aan saaka suuqa usoo doonay oo aan ka daahay, xilli badan ayaan askarigi ii wardoonay sugayay. Hadaa waa ay ogaadeen inay wax jiraan maadaama aan aad u habsaamay. Waxaa iidhawaaqay askarigi la diray, Deynabo sow ma ahayn magacaaga?

- Haa
- Aabahaana Iikar Cusmaan?
- Haa
- Aabahaa wuu caafimaad qabay iyo hooyadaaba, waxaase xalay ka dhintay gabar ayay iisoo sheegeen. Ayuu askirigi ii fariin keenay.
- Mulki? Ayaan cabaaday, Mulki miyaa?, ma xasuusto inuu ii jawaabay askarigi fariinta ii waday iyo in kale, waxaase ila wareegay dhulki, waxaa igu yaraaday sambabaha aan ka neefsado, neefti aan qaadanayay ayaa dhuunta ii istaagtay, meeshi ayaan ku dhacay. Waxaan soo toosay anigoo biyo wejiga la iiga

www.bilehashi.se

shubayo, waxaa i kortaagnaa Qaali iyo Cilmi, waxaan joogay daashka guriga reer Cilmi.

- Wey soo miyirsatay! Ayaan maqlay Qaali oo la hadlaysa Cilmi.

Madaxa ayuu gacantiisa oo wejigeyga ka qaboobeyd ii saaray, oo magaceyga iigu yeeray; Deynabo!… Deynabo…ma i maqleysaa?

Indhaheyga anigoo jiifa iyo indhihiisa isagoo i dhinac fadhiya markey isku dhaceen ayuu ii sheegay wixi igu dhacay. Oohin hor leh ayaan mar labaad bilaabay. Dhinacaan u jiifay ma ahee dhinici kale ayaan isku gediyey si aan wejiga uga qarsado, jilbihi ayaan wejiga usoo dhaweystay…alla hooyadeeyeey! Ayaan la baroortay.

- Ilaah inaan ku mahdino ayaan mudan nahay Deynabo - ayuu Cilmi igu deji isyiri,- naf waliba wakhtigeeda ma dhaafto, intaad ooyi lahaydna waxaa kuu roon inaad u duceyso!. Inti dhimatayna waa un ay naga horeeyaan mooyee anagoo idil ayaa u socona halka ay tageen.

- Ereyadiisu waxay ku dhacayeen qalbigeyga sidi bacaad kulul oo biyo qaboow lagu shubayo. Uurkeyguse wuu diidanaa inuu ilmada joojiyo. Ilaa uu isoo fadhiisiyey oo Qaali iigu diray cabitaan qaboow.

- Dhuunta ayaa ku qalalan ee biyo kabo! Ayuu igu yiri isagoo sariirtaan jiifay dhinac ka fadhiya, gacanta

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ayuu dhabarkeyga intuu hoos gashtay kor iisoo dhif-saday oo isoo fadhiisiyey. Wuu i dhinac joogay ilaa indhaheygu ilamada ka dhaafeen, dabadeedna wuxuu gooni ula hadlay Qaali oo igu dhaafay

*

www.bilchashi.se

Waxaan tuhmay inuu Qaali igala hadlay inaan nasto maalmihi xigay, waayo xitaa hadii aan is adkeynayay oo islahaa shaqada u qabo sidaan u qaban jiray waxay Qaali i lahayd, taa anigaa qabanayee adigu tan kale qabo. Marwalba midi fudud ayay aniga ii direysay. Sahro mar aan qolkeeda ka soo nadiifinayay ayay itiri alaha u naxariisto walaashaa waan maqlayee.

Waxaa marwalba niyadeyda ku xaadir ahaa Mulki maalmo badan oo ka dambeeyey markii geerideedu isoo gaartay, sawirkeeda marwalba i hor joogay wuxuu ahaa kulankeeni maalintaan suuqa ku arkay oo aan gacanta haystay Ismahaan. Habeenkii waxaan ku qarwi jiray anigoo daba ordaya Mulki iyo iyadoo iga ordaysa oo dhex ordeysa dad badan oo suuqa joogay. Markaan isiri waad soo gaartay ayay horteey-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

da ku kuftay oo ku kor dhacday mindi kasoo fakatay kawaanlaha. Intaa markuu qarowgu joogo ayaan hurdada kasoo boodi jiray anigoo jirkeygu dhididku wada qooyay.

Goor ay subax tahay ayuu maalintii dambe Macoow ii keenay war niyadeydu jecleysatay. Isagoo wejigiisu farxad ka muuqato ayuu iiga horyimid wadada gurigeena iyo dukaankooda u dhaxeeysa.

- Deynabo….Deynabo…waa laga qaaday karantiilki wuu dhamaaday, dhakhaatiirtii waxay yiraahdeen daacuunki waa laga guuleystay. Xalay saq dhexe ayaan soo maqlay warkaa cusub laakiin… Intaa markuu ii sheegay ayaan kala aamusnay waxoogaa. Aniguu war iga sugayay, aniguna ma aqoon sidaan yeeli doono, waayo diyaar uma ahayn talaabada xigta.
- Maxaan yeelnaa hada?
- Ma ogi! Ayaan iri
- Ma aadnaa hada? Ayuu iweeydiiyey hadana isqabtay maadaama uu isgartay inuu iloobay inaan reer jaariyad u ahay oo aan shaqo ku jiro.
- Galabta ayaan aadi karnaa! Ayuu hadana igu soo celiyey asagoo simaha heysta madaxiisuna soo fooraro oo indhaheyga eegaya.
- Waa yahay! Ayaan iri anigoo aanan hubin in sidaa

www.bilehashi.se

aan yeeli doono, waxaan markiiba u noqday gurigi oo ku gargaraacay qolki Qaali, waxay ku wardineysay sariirteeda, wey ila yaabtay markey i aragtay.

- Maxaa dhacay?

- Karantiilki waa laga qaaday!, ayaan u sheegay anigoo farxad wejigeygu ka muuqo - waxaana rabaa inaan jimcadeeydi la ii gudo maanta! Ayaan u amaah sheegtay. Waxay ahayd maalin arbaco. Waxay kusoo fadhiisatay sariirti ay jiiftay.

- Waa war fiican waxaad ii sheegtay, laakiin waa inaad ilaa caawa sugtid. Ayay itiri

- Caawa?

- Waxaa fiican inaan xeelad lahaatid! Ayay istiri u caqliyee, oo hadii aad hada cararto oo Sahro kala kor dhacdid warka, waxaa la arkaa inaad utagtid iyadoo wax kale ka caraysan oo markaa ay kuu diido cod-sigaaga, Sahrana waad taqaanoo hadii ay wax tiraahdana ma jecla in laga daba yiraahdo, waxaa aniga ila quman – ayay tiri – inaan Cilmi la sugno, oo isaga uu fasax kaaga qaado, isaga wey dhageysataa.

- Caawa wey fog tahay ayeeyo!, ayaan cod dacwo ah ku iri.

- Hadii aadan sugi karin waxaan yeeli karnaa, inaan aniga maanta shaqadaadi sii qabto oo aan miiska sii dhigo qadada inta aysan Sahro iyo caruurtu soo fadhiisan, oo markaa aysan ku garan inaad joogto iyo in

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

kale, hadii ay ku tabtana aan been sheegoo dhahaa anigaa meel u dirsaday, oo aad adiguna soo noqotaa intaanan qoraxdu dhicin. Waxaase igala fiican – ayay igu waanisay - in aad caawa sugtid oo Cilmi uu fasax kuu weydiiyo, markaa xitaa waxaa la arkaa in khamiista beri ah iyo jimcadaba aad reerkaada lasoo joogtid. - Waayahay! Cilmi ayaan sugeyna ayeeyo. Ayaan u jawaabay markaan xoogaa isku barbardhigay labada fursadood.

Maalintaa arbaco waxay igala dheereeyd maalmo badanoo la isku daray, waxaa fiidkii Qaali iisoo sheegtay inuu Cilmi i fasaxay, waxay isiisay mushaharkeygii labada todobaad, waxaan gashtay boorso uu iigu jiray mushaharkii la isiiyey jimcadii aan baaqday.

Arooryadii khamiiseed oo aan reerkeena u socday markaan soo toosay waxaan dareemayay in caloosha gudaheeda wax iga xanxanteynayaan, sidii in baraf qaboow caloosheeyda isku rogrogayo sidiisii. Waxaan ka welwelayay in aan u tago wax aanan filaynin.

Markaan soo macsalaameeyey Qaali iyo Ismahaan oo albaabka ila soo gaaray waxaan arkay Macoow oo dibeda gurigi igu sugaya, sidii inuu ogaa saacadaan albaabka kasoo baxayo, yaase og intuu halkaa taagnaa

www.bilehashi.se

oo uu igu sugayay?. Markaan wejigiisa arkay gadaal ayaan eegay, keligeey inaan ahay ayaan gartay.

- Subax wanaagsan! Ayuu igu salaamay oo iweydiiyey waxa igu dhacay oo aan shalay galab balanta uga baxay?

Wejigeeyga ayuu jawaabti ka helay markaan indhihiisa eegay.

- Waa laguu diiday fasax sow ma aha? Ayuu yiri isagoon jawaab iga sugin.

Waxaan arkay inuu wax kasoo saarayo bac uu gacanta ku watay. Waa maxay ayaan su'aalay.

- Waa daawo, aan rabo inaad waalidkaa ugeysid. Ayuu ii sheegay.

- Daawo?

- Haa, waa daawo u fiican dadka daacuunka ku dhacay ama raba inay iskaga difaacaan.

Waan ku qoslay…….

- Maxaad ku qosleysaa?, dhakhtar farmashiyaha joogay ayaa sidaas iigu sharaxay anigubee.

- Raali ahow, ayaan iri anigoo gacanta afka ku haya.

Waan ka helay siduu ii jecel yahay iyo siduu iiga fekeray, waxaan ogaaday in uu dhab ii jecel yahay.

- Waxaa kaloo ku jira alaabo aan isiri wey ubaahan yihiin reerkiina, waa sokor iyo qamadi, ayuu yiri isagoo itusinaya bacda gudaheeda. Waxaan maqlay ayuu sii watay hadalkii – in dukaamada xaafada la karan-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

tiilay cunto badan aysan oolin, inta taalana qiimo aad usareeya looga iibinayo dadka, dadkuna maadaama ay wakhti dheer dibeda uga soo bixin xaafada oo aysan lacag soo shaqeeysanin dhibaato weyn oo xaga cuntada ah ayuu daacuunki ka tagay.
- Waad mahadsan tahay Macoow. Ayaan u mahadceliyey, runtii aad ayaan u jecleystay sidaad iiga fekertay laakiin ma kaa qaadan karo waxba.

Wuxuu i xasuusiyey saboolnimada reerkeena ku nool yahay, aad ayaan u necbaa inaan qirto inaan reer sabool ah ka dhashay, cuqdad ayaa i heshay sidaan reer Cilmi ugu imidba. Waxaan bilaabay inaan ka fekero waxyaalo badan oo aanan hore uga fekeri jirin markaan reerkeena la noolaa, sida in dadku isku qiimeeyo maalka ay leeyihiin. Waxaan kaloo ogaa inusan Macoow isaguba wax saas ah idhaamin oo aabihihiis dukaanka yar uu leeyahay mooyee aysan maal badan lahayn. Wuxuu mar iisheegay inuu aabihii ka qaato mushahar yar oo uu wuxuu ubaahdo ku iibsado. Niyada ayaan ka jecleystay inuu dartey mushaharkii yaraa ee lasiiyey uu wax iigu soo iibiyey.

- Deynabo, adiga hadaad iga diiday, fadlan igu caawi inaad sodohdey iga gaarsiisid!. Ayuu igu yiri isagoo ii dhoolacadeeynaya garabkana iga taabanaya.

www.bilehashi.se

- Sodohdaa? Oo goormaad iguursatay?, waan ogaa inuu ila xifaaltamayo sidaa darteed ma aanan xanaaqsanayn markaan sidaa dhahayo.

Wuxuu yiri hadii aadan adiga iga qaadin, anigaa lugteeyda ugu geeynaya. Waan ka qaaday oo u mahadceliyey mar labaad intaanan ka tegin. Anagoo aanan is gacan qaadin ayaan u dhaqaaqay jihada gurigeeni. Intaan xaafada waalidkeey usoo socday waxaan soo maray wadooyin firaaqo ah, wadooyin aanan dad wax ku iibineynin caruurna ku cayaareynin sidaa oo aan arki jiray intaanan daacuunku iman. Waxaan soo gaaray gurigeena anigoo jirku i jareynayo, wadnahana aanan dareemi karin inuu igaraacmayo iyo in kale, waxuu wakhtigu ahaa xilli barqo ah qoraxduna kulkeedu weli maqan yahay, albaabki ayaan iska soo riixay, waxaa daashka gees meel ah fadhiyey hooyo, oo gambar ku fadhida, waxay suxuladeeda u saarnaayeen jilbaha calaacasheeduna dhabanada, waxaa sali meel iyada ka fog yaalay ku jiifay aabahay oo indhihiisu cirka iyo caadkiisa eegayaan. Way kala aamusnaayeen sidii laba ruuxoo xurguf dhex martay. Markaan gudaha usoo dhaafay waxaan iska laabay albaabki aan kasoo galay, waxaan usoo dhaqaaqay xagii hooyo oo aan jilbaha dhigtay cagaheeda hortooda, wejigeeyga ayaan keeda ku aadiyey, waxay hayd

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ruux maqan oo aanan ujeedin in ruux horteeda taagan yahay.

- Hooyo! Ayaan iri anigoo dhabanadeeda ku salaaxaya gacanteyda, wey soo booday sidi ruux hurdo kasoo toosay markey codkeygi maqashay.
- Maano! Ayay iigu yeertay magacii walaashey.
- Hooyo waa aniga Deynabo! Ayaan u saxay.
- Deynabo! Ayay tiri intey ifiirisay, labadeydi gacmood ayay labadeeda gacmood ku qabatay. Hooyo, Mulki wey naga tagtay, kii nasiiyaa la noqday. Waxaan gartay inay aniga ii tacsiyeyneyso. Waan ku farxay, waayo labadeenuba hadaan isku tacsiyeyneyno waanu is weheshanaynaa, oo dhibka keli kuma ahaaneyno.

Aabe ayaan misna saligiisi ugu tagay, oo isna aan dhabanada ka dhunkaday, isna dhabankuu gacanta iisaaray, markaan xoogaa sheekeeysanayno ayaan waxaan weydiiyey in Maano iyo Ibraahin loo sheegay geerida Mulki. Madaxa ayuu ruxay oo yiri; waa naloo diiday inaan aqaladeena kasoo baxno, dhakhaatiir iyo askar ayaa meel walba taagnaa oo dadka u diidanaa iney guryahooda kasoo baxaan, dad badan ayaaba u dhintay gaajo laakiin lagu daray xisaabta kuwa daacuunka u dhintay, Maano iyo Ibraahinse way maqli doonaan oo hada karantiilki hadii nalaga qaaday dad-

www.bilehashi.se

ku waa isku socon karaa. Ayuu igu yiri.

*

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Khamiisti iyo Jimcihi waxay igu dhaafeen sidi dabeyl meel aan la degenayn martay. Waxaan subixii Sabti usoo dheelmaday xaafadii reer Cilmi. Qaali oo albaabka iga furtay markiiba waxay ii tilmaantay howshi isugeysay. Waxaan u imid dhar aad u fara badan oo qol maqaasiin ah tubnaa, dharku waxay yaaleen dhulka waxayna u ekaayen sidi buur meel ka qotonta, waan ka naxay oo anigoo eegaya ayaan dhabarka qeybtiisa hoose gacanta ku daliigtay. Waxaa maalinkaa la iga hayay dhabarka oo waxaan qabay caado, yaanse dhibkeyga usheegtaa oo ku ooyaa?.

Halkii ayaan usoo qaatay dharkii xagi daashka oo baafku iiyaalay. Wakhti dheer ayay igu qaadatay intaan ka dhaqo, oo anigoo aanan weli wada warrin dharki ayaan intaan qaar biyaha uga tagay u baxay suuqi si aan usoo adeego qadadii maalinkaas.

Markaan suuqa kasoo socday waxaa i gubanayay maskaxda, waxaan dareemayay inay maskaxdu i karkareyso sidi ukun dabka lagu shiilayo. Dhabarka oo i dikaamayay awgii waxaan rabay inaan qunyar usocdo, waxaase i dedejinayay kuleylka madaxa iga

www.bilehashi.se

gubaya. Dadku badankiis maalmahaas waxay adeegan jireen barqada iyo wixii ka horeeya si markii ay qoraxdu usoo kululaato guryaha loogu jiro, xitaa aniga sidaa ayaan yeeli jiray balse maanta dharka oo aad u badnaa ayaa i daahiyey oo suuqa ikeenay xilli aanan dadku socon.

Maalinkaas markaan qadadi kariyey, khudaarti jarjartay, cabitaanki qasay miiski gogoshay oo cuntadi iyo cabitaanki kala geeyey istiraashana kursi walba dulsaaray, waxaan soo fadhiistay jikadi si aan aniguna u qadeeyo, waxaa ii yeeray Sahro oo ii sheegtay inaan istaago oo farmashiyaha uga doono daawada mataga, waxaa matagayay Ardo, oo waxay tiri ma la sugi karo waa inaad istaagtaa oo lasoo orodaa daawada.

Intaan dharka bedelanayay waxaa qolka iigu yimid Ismahaan oo maqashay inaan dibeda aadayo, Aad ayay Ismahaan u jecleyd inay iraacdo mar walboo aan baxayo.

- Waan ka ogolaaday inay iraacdo, oo waxaan usoo noqday qolkii qadada si aan Qaali lacag uga qaato. Markaan lacagti ka qaatay ayaan waxaan u sheegay in Ismahaan ay aniga i raaceyso. Sahro oo qolka iyaduna fadhisay ayaa soo booday oo tiri.

- Maxaa tiri?, iney iraacdo!, naayaa, ma cunugta inaad iga dishaad dooneysaa? oo kuleykan jira dibeda ugu kaxeyneysaa.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Maya Eedo, iyadaa iweydiisatay iney iraacdo.
- Soco, oo daawada iila soo dhaqso!, ayay i amartay iyadoo gacanta iiga baaqeysa inaan baxo, kaalay adigana! Ayay tiri iyadoo la hadleysa gabadheeda.

Wadooyinka waxay ahayeen firaaqo, qof qof ayaa iga hor imanayay markaan xoogaa socdo, waxaan usii socday farmashiyaha wakhti la'eg intii shaah lagu kariyo. Markaan farmashiyihi imid waxaan ogaaday inuu xiran yahay!, dhowr jeer markaan garaacay oo la iga furi waayay ayaan dib ayaan wadaddeydii usoo raacay hadana. Dadka iga hor imanaya waxay qaar wateen dalado, kuwana waxay wejiga ku hayeen safaleeti ay biyo qabow kusoo qoysteen. Anigu intaba waan garan waayay markaan kuleylkan usoo baxayay. Markaan guriga kusoo noqday Sahro sidii caadiga u ahayd ayay inay i canaanato bilowday sidi in aniga khaladkeyga yahay in farmashiyuhu xirnaa. Balse hada waxaan u shaqeynayay mudo sanad ku dhow oo waan bartay oo ma kala jeclaan jirin qeyladeeda waayihi dambe.

*

www.bilehashi.se

Waan dhaafay inaan xisaabiyo kulanka aan kulano aniga iyo Cilmi, waxaan u kulmi jirnay todobaadkiiba laba habeen oo uu caruurtiisa waxbaro, fiidki waxaan aniga, isaga iyo labadiisa gabdhood ku balami jirnay qolka maktabada ah, halkaa oo uu xisaabta iyo xarfaha ku bari jiray caruurta si cayaar iyo maadd ku jirto, wuxuu Istar derbiyada qolka ugu dhejin jiray waraaqo uu ku qoray xarfo erey isku noqonaya, wuxuu ku dhihi jiray adiga iyo Deynabo ayaa baratamaya, oo midba doorkiisa ayuu kursiga ka istaagayaa oo derbiga warqad ka mid ah waraaqa uu ku dhejiyey soo fujisaneysaa oo laga doonayaa inay hingaadiso. Markey akhriso ereygi, waxaa laga doonayaa tan fadhida inay warqad hor taala ku qorto ereygi ay maqashay.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Aniga waan aqaanay akhriska, isna wuu ogaa inaan fasalka todobaad iskuulka ku gaaray, laakiin wuxuu ii rabay inaan ula joogo si uu u dhiirigeliyo gabadhiisa Istar, oo markey ila baratamayso si daran ayay iskugu taxluujin jirtay inay hingaadiso oo iga badiso. Ismahaan iyadu waxay ahayd afar jir oo xarfaha ayuu ugu heesi jiray sida loogu dhawaaqo, B, T, J…iyadana wey kadaba heesi jirtay iyadoo ku qosleysa.

Niyada ayaan ka ximin jiray gabdhihiisa iyo nasiibka ay leeyihiin, waxaan jeclaa in uu aabahay sidaa aniga iila cayaari lahaa, iiga qoslin lahaa, ii bari lahaa inta uu idhaamo. Inta aan ka xasuusto nolosheyda waxaan ka xasuustaa un nolol xarbi iyo xoogsasho ku saleysneyd inaan reerkeeyga lasoo maray. Yaraanteydi aabahey wuxuu noo iman jiray fiidki isagoo daalan oo jirkiisu tabar laheyn maadaama uu soo shaqeynayay siduu waagu u baryay, waxuu soo shaqeeyeyna waa adkeyd in baahida reerkoo idil ay haqabtirto.

Wuxuu ii dhiibay shaqo kale, habeen habeenada ka mid ah markii uu gabdhaha casharkoodu u dhamaaday ayuu i weydiiyey inaan daalanahay iyo inaan inaan shaqo u qabto isaga.

Aad ayaan uga heli jiray la joogiisa Cilmi, maadaama uu ii naxariisan jiray, oo uu ii roonaa, waan awoodi waayay inaan ka diido codsigiisa. Waxaan rabay

www.bilehashi.se

inaan caawiyo hadii aan caawin karo, xitaa anigoo aanan markaa hubin howsha uu rabo inaan u qabto hadana waxaan dareemayay dareen ah sidii inuu amaah igu leeyahay, maadaama uu iga difaaci jiray xaaskiisa markey ii darnaato, ama uu iga wareysan jiray reerkeena. Waxaan ku jeclaa wuxuu i dareensiin jiray inaan reerkiisa ka mid ahay, halka ay xaaskiisu marwalba iga xasuusin jirtay inaan jaariyad un u ahay reerka. Wuxuu mar i weeydiiyey taariikhda maalinta sanadka aan buuxinayo si uu hadiyad iigu keeno. Waxaa maalinkaa uu iweydiinayo su'aashaa sanad buuxineysay gabadhiisa Istar. Ma aqaano ayaan iri wakhti aan dhashay. Waxba maleh! Ayuu iyiri waxaad hada wixii ka dambeeya sanad la buuxineysaa Istar, oo wuxuu isiiyey baakad xiran oo hadiyad ku jirto. Habeenkaa markaan baakadi ku furtay qolkeyga aad ayaan ugu farxay.

- Ma daalani, waan ku caawin karaa!. Ayaan u sheegay.

Wuxuu i horkeenay warqad dheer oo dhinaca bidixna magacyo uga qoran yihiin dhinaca midigna tirooyin.
- Waxaan rabaa ayuu yiri, inaad ii yeerisid magacyada meeshan ku qoran iyo tirada magac walba ku hortaala.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

- Waayahay. Ayaan iri anigoo ku faraxsan howsha la ii dhiibay.
- Ma fahantay?, si fiican ma u fahantay waxaad sameyneyso?. Ayuu i hubsaday inaan fahmay.
- Haa waan fahmay!

Waxaan fadhiyey kursi, warqada aan ka meerinayana waxay dulsaarneyd miis i horyaala, korkeyga waxaa ku aadana nal ifinayay warqada. Wuxuu u dhaqaaqay meel iga durugsan oo dhowr talaabo ii jirta, halkaas waxaa uyaalay miis uu dul saaran yahay teeb, wuxuu khaanada miiska kala soo baxay warqad cad oo uu teebka gashtay, kursigi ayuu fadhigu ku saxday oo yiri:

- Okey Deynabo!, diyaar ma tahay?
- Haa!. Sadarkii koowaad ayaan akhriyey, magacii koowaad ayaan u sheegay, misna tiradi ku hor qorneyd. Hadana sadarki xigay, hadana mid kale. Warqadii labaad markaan sadarkii sadexaad akhrinayo ayuu soo istaagay oo yiri i tus meeshaad maraysid. Xageeygii ayuu usoo dhaqaaqay, wuxuu soo istaagay gadaasheyda oo anigoo weli fadhiya ayuu dusheyda ka akhristay warqadii i hortaalay, wuu yara aamusnaa in qadar ah isagoo weli gadaasheyda taagan, aad ayuu iigu dhawaa jirkiisu, waxaan dareemi karay xitaa neeftiisa oo qoorteyda xanxanteeyneeysey, hoos ayuu usoo weecday si uu warqada waxa ku qoran uu

www.bilehashi.se

u arko, waxaan dareemay dhabankiisa oo xiskeeyga taabanaya. Labadiisi gacmood ayuu warqadi miiska saarneyd dhinacyadeeda dhigtay oo cugsaday miiski isagoo weli i dul taagan, Anigoo markan hoostiisa kujira oo jirkeeyga yari uu u dhaxeeyo miiska iyo isaga ayuu farta sadar iigu fiiqay, hadana intuu gacanteydi midig gacantiisa aayar ugu qabtay ayuu iyiri fartaada ii dhiib, farteydi ayaan u dhiibay, wuxuu dul saaray sadarkii labaad ee warqada, - halkaa fartaada ku haay! Ayuu i amray inaan sadarkaa farta ku hayo. Wuxuu u dhaqaaqay xagii teebka, oo intuu warqadiisa ka meeriyey magac i weydiiyey inuu magacaas ku qoran yahay sadarkuu farta iigu fiiqay kan ka hooseeya.

- Haa wuu ku qoran yahay!

- Okey, markaa waan saxanahay. Ayuu yiri isagoo xageyga usoo dhoola-cadeynaya.

Habeenkaa waxaan bognay howshaa xilli dambe, intaanan kasoo bixin qolka aan ku wada jirnay- oo aanan markaan ka qaloonin inaan keli ku wada ahaano aniga iyo isaga - markuu qoraalki bogay wuxuu ku fadhiyey kursi gaaban oo isbuunyo ka sameysan, aniguna mid kasoo horjeeday. Wuxuu meerinayay warqadi uu qoray, aniguna waan ka saxayay, qolku wuxuu ahaa shib aan wax jabaq ah jirin, waxaa xitaa dhegtu maqli kartay hawada aan neefsanayno hadii laga saaro

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

codkeena. Indhaha ayuu sadarba sadar la raacayay, aniguna waxaan ku maqnaa wejigiisa, indhihiisa yaryaraa yaan eegayay iyo siday u shaqeeynayeen, timihiisa ayaan isha mariyey oo la dhacay sida uu u seexiyey, bushimihiisa kuuskuusan ayaan hoosta uga qoslayay siday marba dhawaaqa usameynayeen intuu warqada akhrinayay, xitaa iyadoo warqada uu gacanta ku hayay iga xigtay inaan wada arko waxaan gartay habeenkaa in garbihiisu balaaran yihiin. Markuu dhameeyey ayuu qoslay oo yiri si wanaagsan ayay kusoo baxday.

Intaan albaabka usii soconay si uu isna iiga soo xirto aniguna aan uga baxo ayuu i istaajiyey oo gacanta iga shumiyey. Wuu igu mahdiyey howsha aan la qabtay, wuxuu ii balan qaaday inuu iga abaal marin doono.

Ma abaal kale ayaanse uga baahanahay, aniguba waan jeclaa inaan la joogee!, Markaan qolkeyga imid waxaan weli maqlayay sida wadnihiisu u garaacmayay markuu gadaasheyda taagnaa, waxaa gacanta iga qutquteynayay bushimihiisi i shumiyay, waxaa qoorta iga xanxanteeynayay neefta afkiisu qaadanayay, ilkihiisa cadcad ayaa ii dhoola-cadeynayay ilaa aan ka gam'ay habeenkaa anigoo niyada ka faraxsan. Weligey habeenkaa ka hor nina iiguma mahadcelin sida uu iigu mahadceliyey, gacana cidna igama shumin

www.bilehashi.se

inaan aniga ka shumiyo ruux aan qadiranyo mooyee. Waxaan dareemay inaan ahay ruux muhiim ah, taa oo niyadeyda farxad ku dhalisay. Habeenkaa waxaan ku riyooday anigoo xaaskiisa ah. Riyada kuma jirin cidkale oo aan labadeena ahayn.

*

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Jimcadii markaan reerkeena u imid waxaa kaloo guriga joogay walaalkeey Ibraahin oo aanan waxbadan is arag. Waan isku soo boodnay oo kala wareeysanay nolosheena. Wuxuu ii sheegay inuu nolol adag ku nool yahay, in shaqadu ku culus tahay, in uu dhibaato kala kulmay gabar ay isjeclaadeen, in loogu diiday maadaama uusan maal laheyn, reer sabool ahna ka dhashay. - Waa iska aduun! ayaan ugu niyad dhisay. maadaama aanan arrinkiisa xal u heynin

Wuxuu yiri hada waan soo bartay farsamo aan ku shaqeeysto mana u baahni inaan reerka ka maqnaado sidaa darteed ayaan usoo noqday, waxaana shaqo ka raadsanaa magaaladan. Aabe wuu ku farxayaa hadii uu maalin walba i arko, isaga ayaanan dartiis usoo noqday, hadii kale meelo kale ayaan u shaqo doonan lahaa.

Waan ku farxay hadalkiisa waxaana ku baraarujiyey inuu si degdeg ah shaqo u helo, maadaama ay reerku taakulo u baahan yihiin.

Casarkii qoraxda oo sii dhaceysa anigoo casho u

www.bilehashi.se

diyaarinaya reerkeyga intaanan ka aadin reer Cilmi ayay hooyo iiga nixisay hadal ay suuqa kasoo maqashay.

- Waxaan maqlay inaad wiil uu Xaaji dukaan leh dhalay wada socotaan ee maxaa ka jira? Ayay isu'aashay.

- Wiil uu Xaaji dhalay? Ayaan ku warceliyey anigoo wejiga u kaduudaya sidi ruux aanan fahmin meesha laga hadlayo.

- Maxaan ka ogahay waxa dhalay, waa hadal suuqa oo dhan looga sheekeysanaye? Ayay hooyadeyna ii soo jawaabtay iyadoo gacmaheedu ku mashquulsan yihiin weelal ay dhaqeysay.

- Suuqa?, hooyo ma ogi suuqa waxa looga sheekeystay, laakiin waxaan ogahay in hadalo badan oo suuqa looga sheekeysto ay yihiin hadal aan sal laheyn.

- Maxaa dadku ugu shekeysanayaan hadii hadal aanan jirin uu yahay? ayay ila heshay su'aal adag. Aniguna jawaab ayaan waayay oo waxaan isku mashquuliyey digsigi aan walaaqayay, burjiko aanan babis ubaahneyn ayaan babis la galay, dhuxul uusan debku u baahneyn ayaan ku riday, waan ismashquuliyey. Aamuskeyga ayay u fasiratay inuu hadalku yahay mid jira.

- Waa wiil fiican ayaa la iisheegay? Ayay sii wadatay hadalkii

- Yaa kuu sheegey hadalkaas hooyo? Ayaan ku iri cod

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

uu ka muuqdo inaan ka carooday sheekadaa suuqa looga sheekeystay.

- Aay Culumo!, ayay tiri, hadaad xasuusatid waa islaantaanti aan caanaha ka iibsano. Keligeedna ma ogee, waxaa xitaa agfadhiyey islaan xaabada iibisa oo iyaduna u hadleysay sidi ruux xoog ogaal u ah arinkiina.

- Hooyo, wuu jiraa wiilka aad sheegeyso oo waa wiilka iibiya dukaanka reer Cilmi looga adeego, lakiin wax na dhexmaray iyo wax na dhex mari doona midna ma jiraan!. Ayaan u qeexay. Hadana si ay iiga naxdo ayaan ku iri, guurna ma gaarin hooyo oo weli waan yarahay.

- Aniguba hooyo adigaan kula da' ahaa markuu aabahaa isoo doontay!.

Aad ayaan uga carooday inay ila rabto wiil ay sheeko ku maqashay oo aysan weli arag. Waxaan rabay markaa hadii aan baalal leeyahay inaan u biibo xaafadi reer Cilmi, oo aanan ubaahanin inaan hooyadeey iska difaaco ama aan dhageysto sida ay u difaaceyso Macoow. Iyada ayaase joojisay hadalkiisa markii ay garatay ineysan jawaabteey rabtay iga heleynin.

Fiidkaas intaan usii lugeeynayay xaafadi reer Cilmi waxaan kusii fekerayay jidka, waxaana iga nixiyay nafteyda iyo fikradahayga markaan dib usoo

www.bilehashi.se

xasuustay hadalkii aan hooyadeey kula sheekeystay saacadihii ugu dambeeyey. Waxaan dadka ku eedeynayay inay maalka isku qiimeeyaan iyo in maal yarida ay isku fogeeyaan, waxaa ihor yimid codkeeygi aan hooyadeey kula hadlayay; markaan Macoow ku fogeeyey inuu maal yar yahay oo hooyadeey usheegay inaanu waxba naga dhex dhici doonin, tolow ma fikrad aniguba aan qabaa, ma tabar yaridiisa ayaa iga keentay inaan hooyadeey ku iri; waxba nagama dhex dhici doonaan?, maxaan ku fekerayay markaan sidaa lahaa?.

Waxaan misna xasuustay sidi uu daawadi iyo cuntadi iigu soo dhiibay reerkeena iyo sidi uu iila dadaalay berigi daacuunka. Waxaan isweeydiiyey in nolosheyda waxbadan iska bedeleen sidaan reer Cilmi ugu imid?, iyo inay qiimeynta dadka iyo waxa aan ku qiimeeyo ay saldhig u ahayd dhabta waayuhu i barteen?. Waan isxumeeystay, waxaana goostay inaan caawa cagta sii mariyo oo salaamo Macoow, sidaa ayaana yeelay.

Jimco kale markii aan u imid reerkeena wuxuu aabahay iga wareystay Macoow. Markaan usheegay inaan dukaankiisa ka adeegtana wuxuu iisheegay inuu berigi daacuunka dad badan uu fariin uu soo faray oo xaalkooda ka wareystay inteey karantiilnaayeen. Waa wiil fiican ayuu aabahayna la qabay fikrada hooya-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

deey ay hore iigu sheegtay.

Waxaan habeen anigoo kasoo adeegay foornada xaafada lugta soo mariyey maqaaxi aan islahaa wuu fadhiistaa, sidaan filayay ayayna noqotay oo uu fadhiyey!, waxuu la fadhiya laba wiil. Markaan usoo dhawaday ayay labadii wiil isku baaqeen. Waxay ka kaceen halkii ay fadhiyeen, Macoow oo ila yaaban arrinta ikeentay xilligaas ayaan u baaqay inuu isoo raaco, waxaan istaagnay luuq mugdi ahaa oo u dhaxeeyey maqaayada uu saaxiibadii la fadhiyey iyo guryo ka dambeeyey. Waxaan usheegay inaan uxiisay. Waa markii ugu horeeysay oo aan u qirtay inaan wax la wado. Reerkeena ayuu iga wareystay waxaan usheegay inuu xagooda ka amaanan yahay. Wararkiisa iyaga gaareyna ay la dhacsan yihiin.
Farxad ayaa wejigiisa ka muuqatay intuu idhageysanayay. Markii labaad ayay istaabteen feerahiisa iyo naasaheyga markaas soo curtay, intaanan habeenkaa kala tagin.

*

www.bilehashi.se

Waxa dhacay maalin arrin aan in badan ka cabanayay sidaan guriga reer Cilmi u imid. Waxay ahayd makhrib ay Sahro isku diyaarineysay casumaad ay u socotay, waxaa la iiga yeeray qolkeeda. Aniga oo jikada jooga ayaa waxaa ii yimid Istar oo itiri hooyo ayaa kuu yeereysa, markaan isiri dhamee weelka aan dhaqayay waxay Istar iigu celisay warkii; inaan hada dhaqaaqo, si degdeg ah ayay kuugu baahan tahay!, ayay i amartay sidi hooyadeed. Waxaan ka baxay jikadi oo orod ku koray jaranjartii igeyneysay qolalka sare halkaa oo ay Sahro igu sugeeysay. Albaabki nuska balaqnaaa ayaan iska soo riixay anigoo warmoog ah.

- Aaway dhegodhageheygi? Ayay su'aal iga horkeentay Sahro iyadoo simaha heysata oo hortaagan

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

miraayad ay isku eegeysay.

- Eedo….ma arag dhegodhagahaaga! Ayaan cod hooseeya ugu sheegay. Anigoo la yaaban su'aasha.

- Maxaad hoosta la eegeysaa?, isoo fiiri! Ayay igu qeylisay, dhabtii waxaan dhulka u eegayay waxaan ka cabsanayay indhaheeda iyo kuweyga inay isku dhacaan, sidaa waxay ii ahayd caado aan beryihii dambe yeeshay markaan ogaaday in ay iga burji sareeyso.

- Ma iibsatay? Mise reerkiinaad u geeysay?

- Eedo waan kuu sheegay, aniga dhegodhego ma arag, armaajadaadana ma furo inaan dusha ka nadiifiyo ma ogiye!.

- Iigu yeer Qaali! Ayay amartay gabadheedi oo isoo daba ordeysay markeey jikada iiga yeertay oo markaan qolka nala joogtay.

Qaali markey noo timid anigoo ilmeynaya iyo Sahro oo i dhinac taagan, ayay acuudu bileysatay.

- Maxaa dhacay? ayay su'aal u socotay Sahro su'aashay.

- Usheeg wixii dhacay ayay iyaduna itiri aniga iyadoo qeylineysa; usheeg inaad dhegodhagaheygi aad soo iibsatay! Intaa aan hortaaganahay meesha aad mooday in maxkamad la igu saarayo waan isciilay, waan carooday, waan calaacalay laakiin intaba wax wey ii tari waayeen habeenkaa, aad ayay iiga quwad iyo ha-

www.bilehashi.se

dal badneyd Sahro, ruuxii ag joogana way u fududeyd inay ka dhaadhiciso fikradeeda.

Waxaan agtaagnaa albaabka laga soo galo, meel dhowr talaabo ii jirtana Sahro iyo gabadheedana ayaa wada taagnaa. Qaali oo noo dhaxeysay ayaa xageeyga usoo dhaqaaqday oo isu'aashay.

- Ma runbaa hadalka la sheegayo?.

- Maya! Ayaan cod sare ku iri anigoo markaan careysan, oo aanan kala jecleyn inaan Sahro agteeda codka sare ugu qaado, sidaa oo marar badan la iiga digay.

- Si fiican u raadiya ayay tiri Qaali, iyadaana bilawday in ay furto khaanadi ugu sareeysay, hadana khaanadi xigtay, misna mid kale, intiiba waa laga waayay, armaajada hoosteeda ka eeg, ayay aniga ii dirtay Qaali – waxaa la arkaa ayay tiri in ruux ay ka dhaceene.

- Labo dhegodhego mar wada dhacaanee, wakhtiga hanaga dhumin Qaali ee gabadhan kasoo saar meesha ay geeysay dhegodhagaheygi! Ayay tiri iyadoo kusii fadhiisaneysa kursi oo arrinka ku dhaafeysa Qaali.

- Nakeen! Ayay itiri Qaali oo garabka gacanta iga saaratay. Markaan qolka ka baxnay waxey igeeysay jikada, waxey ii gashay waano dheer iyo inay khatar ii tahay hadaan wax-qaad-qaad bilaabo, oo shaqadan la iga burin doono, aabaheyna curyaan yahay oo uu-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

san reerkiisa masruufi kareynin oo reerkeenu u baahan yahay dakhliga kasoo gala Sahro iyo reerkeeda.
Waxaan aniguna marwalba ugu soo celinayay in aanan aniga qaadin, inaanan ogeyn meesha ay jiraan, ineysan igusoo dhici karin inaan sameeyo waxay igu andaceeyneyso.
Markey Qaali iga tagtay waxaan galay inaan sii dhaqo alaabti aan dhaqayay kahor intaanan la iiyeerin, ilinta indhaheyga kasoo qulqulaysay waxay ku tifqayeen weelasha aan dhaqayo, waxay sii raaceysay biyaha wasakhda ah ee alaabta aan ka meyray.

Subixii xigay markuu waagu beryay, waxaan iska qabsaday shaqadeydi, markaan suuqa kasoo noqday ayaan u imid Qaali oo daashka igu isugeysa.
- Maxaad beenta iigu sheegtay xalay? Ayay iga horkeentay
- Beentee? Ayaan su'aalay anigoo la yaaban waxay ulajeedo beenta aan sheegay, balse tuhunsan in arrinkii dhegodhagaha ay ulajeedo.
- Dhegodhagihii waan helnay saaka! Ayay itiri
- Xageed ka hesheen ayaan weydiiyey anigoo raba inaan ogaado oo intaan kor u boodo ku iraahdo; waataa waxaad igu nabsaneyseen!.
- Qolkaaga ayaa laga helay! Ayay igu tiri.
- Qolkeyga?

www.bilehashi.se

- Haa joodarigaaga hoostiisa! Ayay Istar oo albaabka taagneyd tiri.

Waan isku yaryaraaday, waxaan dareemay inaanan heynin awood aan ugu sharaxo, waxaan tuhmay in ruux uu ii geliyey joodariga hoostiisa. Yaanse tuhmaa?. Ma Qaali oo aan kula dhacaa; been baad iisheegeysaa oo qolkeyga mahee meel kalaad kasoo hesheen?, ma Istar baan tuhmaa iney intey qolka hooyadeed kasoo qaaday aniga joodariga ii hoos dhigtay?, mise Sahraa waxoo idil ka dambeysa?, Su'aalo badan ayay maskaxdeeyda isweeydiisay, Qaalise waxay isugeysay inaan uga jawaabo su'aasha ay i weydiisay sababta aan beenta xalay ugu sheegay.

- Been ma aanan kuu sheegin! Ayaan gaabsaday hadalkii, maadaama aanan hadal kale heynin markaa oo maskaxdeyda ku mashquulsanayd u jawaabhelka su'aalihi madaxeyga ku wareeganayay.

- Alla ruuxu indho adkaa! Ayay Istar ka faa'ideystayay iney tiraaho intaan aniga iyo Qaali is hortaagneyn anagoo kala aamusan.

Sahro waa sideey fileysay iyo sidey rabtay waxay ku raaxeeysan jirtay inay igu qeeyliso, markaan qadada miiska u geeynayay maalintaas, ayay ku tiri Qaali anigu horaan usheegay gabadhaan, maalintuu Cilmi reerkeeda kasoo watay ayaan iri uma bogin tani!, sidii

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

beyna noqotay oo dabci la'aan, areebanimo iyo waxay isku darsatay inay hada waxqaadqaad bilawday. Maxaa kusoo xiga?. Ayay u dhaaftay intii miiska la fadhiday inay ka jawaabtaan su'aashaa ay madaxoodu ku dhaaftay.

Sahro waxay aad ugu darneyd ereyada uurka iga guba, qalbiga iga jebiya niyadana iga xumeeya. Habeenkaas hurdo ma seexan waxaan jawaab u raadinayay sidi ay dhegodheguhu joodarigeyga ku yimaadeen. Jawaab anigoo aanan helin ayuu waagu iigu beryay. Waxaan soo xasuustay inuu Cilmi i yiri hadii ay jiraan wax aanan kala hadli karin reerkiisa inaan isaga ula tago!, hadana waxaan gartay in dhibaato tan ka weyn iney imaneyso, oo nin iyo reerkiis ayay isku dirtay in la i oran doono. Waxba uma sheegin, mana u maleynayo inay Sahro ka qarisay arrinkaas. Oo wey jecleeyd inay dadka ugu soo celceliso waxay iyadu ku saxan tahay.

*

www.bilehashi.se

Macoow maalmo markaan is moogeeyn ayaan galabtii dambe ugu tagay dukaankooda anigoo aanan muraad kale dukaanka ka laheyn. Nasiibxumo ma uusan joogin isaga, waxaa joogay aabihiis oo aan fariin ugu faray. Laba maalin ayaa raacay maalintii sadexaad ayaan kulanay anigoo suuqa kasoo adeegaya, iyo isagoo dukaankooda bakhaarada suuqa uga soo adeegay.

- Biyo qaboow aan kuu iibiyo ayuu yiri kuleyl ayaa jiree, aniguna kama diidin maadaama aan u xiiso qabay oo aan rabay inaan wada sheekeysano. Wuxuu iga wareystay reer Cilmi, waxaan usheegay dhibaatada aan ka tabanayo islaanta guriga iyo dhacdooyin dhacay. Aad ayuu uga carooday markaan dhacdadii dhegodhagaha iyo wixii aan kala kulmay uga sheekeyeey, Wuxuu iisoo jeediyey inaan isguursano oo aan reerkaa iskaga soo tago.

- Waxaan usheegay inaysan taas macquul ahayn, waa midee reerkeena waxay iiga baahan yihiin inaan masruufo oo hadaan naag laguursaday noqdo waxaan iyaga kaga mashquulayaa gurigeyga iyo dhismihiisa, tan kalena waxaan usheegay in da'deydu weli yar tahay

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

oo aanan guur weli gaarin.
- Waxba ma leh oo adiga, xitaa hadaad habar waayeel ah noqotid waan ku sugayaa!, ayuu kaftan iigu sheegay inaan guur gaaray oo sideed iyo toban lagu guursado.
Ma ogi waxaan sidaa ugu iri, ma qalbigeyga ayaa doonayay inaan wakhti sugo oo arko in aniga iyo Cilmi wax inaga dhex dhici doonaan iyo in kale, mise waxaan u cabsanayay in reerkeena aan u awoodi waayo inaan masruufo hadii aan Macoow guursado?, Ma ogi mideey ahayd.

Waxaan ogaaday inaan Cilmi dareen uqabo, dareen aanan markaa xitaa aniga aanan isku sharixi kareynin ayaan u qabay, wuxuu ahaa dareen jiray oo marwalba ila joogay. Wuxuu ahaa dareen haasaawe oo qalfsan!.

Waxaan xasuustaa inuu xilli markaa wax badan ka dambeeyey uu u taagnaa doorasho. Waxuu aad ugu mashquulsanaa safaro uu ku marayay magaalooyin, tuulooyin iyo beelo wadanka ah. Wuxuu noo iman jiray maalin ama labo oo hadana safar kale ayuu u bixi jiray. Aniguna waxay shaqadeydu ahayd inaan boorsooyinkiisa u xirxiro oo wixii uu u baahnaado ay ugu jiraan. Reerka iyo anigaba waxaan kala socon jirnay tv;ga iyo raadiyaha oo aan codkiisa ka maqli jirnay.

www.bilehashi.se

Aad ayaan waayahaa ugu xiisi jiray markuu guriga ka maqan yahay.

Habeen habeenada ka mid ahaa waxaan kuligeen wada fadhinay qolka weyn ee fadhiga, waxaa laga soo daayay isaga oo markaa dad badan ka hor khudbeynaya. Waan la dhacay khudbadiisa xitaa aniga oo aanan wax sidaas ah ka fahmin waxuu ka hadlayay, wuxuu lahaa; caruurta in xuquuqdooda la ilaaliyo, dumarka loo ixtiraamo sidi hooyo, sidi walaal sidi xaas, sidi gabadh… Fakhriga iyo cadaalad-darada in lala dagaalamo….iyo ereyo kaloo la mid ahaa oo uu ka waramayay ayaa maskaxdeyda taabtay oo ku dhegey. Waxaana xasuustaa in markii aan qolka la fadhiyey hooyadiis, xaaskiisa iyo gabdhihiisa aan khudbada u dhegeysanayay sidi in uu aniga xageyga wejigiisu usoo jeedo oo uu aniga ii khudbeynayo. Waan u dhoolacadeynayay intuu khudbada waday. Raganimadiisa iyo codkarnimadiisa ayaa isoo jiidatay oo xagiisa ii jiidanayay sidi magneetka uu usoo jiidato birta.

Intuu maqnaa waxuu aniga igu wareejiyey inaan caruurtiisa casharadi habeenki aan usii wado oo farta iyo xisaabta u baro. Markuu kusoo noqdo guriga wuxuu ii dhiiban jiray howl, sidi inaan wax uqoro,

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ama waraaqo u jarjaro, ama waraaqo waaweeyn ugu kooleeyo sawiro uu ii dhiibo. Aad ayaan howshiisa iskugu taxluujin jiray inaan uga soo baxo si aan u qanciyo Cilmi, waxaanse beryihi dambe ka khajili jiray inuu i agjoogo markaan howsha u qabanayo, wuu iga burji sareeyey balse si ka duwan sida xaaskiisu iiga burji sareysay oo markuu agteeyda yimaado jirka ayaa i jareyn jirey oo gacmahaan ka dhididi jiray.
Waxaan ka qarin jiray inuu arko gacmaheyga dhibku ka muuqdo oo diirkoodu dayacan yahay, waxey faraheygu u ekaayeen sidi faro kuyaala islaan lixdan jir ah oo nolosheedoo idil dhagax jebin jirtay xitaa anigoo markaa aysan da'deydu ka badneyn sagaal iyo toban jir.

Marar badan ayaan mindi isku gooyay anigoo jikada ku jira, ama feero isku gubay anigoo dhar feereynaya, ama biyo kulul igu daateen anigoo cuntada boobsii isleh, waxaase gacmaheyga ugu darnaa dhar dhaqa, iyo oomada oo diirka ka xuubsata oo maqaarka ka yeesha inuu kala tago oo markay gacantu biyaha ka qalasho waxaa muuqanayay in maqaarku dabcay oo shulshul yeeshay sidii waayeel wejigiisa laablaabku u yeeasho.

Maxaa keenay inaan isaga kala xishoodo inuu arko

www.bilehashi.se

farahayga, oo aanan dan iyo xaajo ka yeelan hadii ay arkaan Qaali iyo Sahro?., ama Macoow?. Marar badan ayaan isweeydiiyey hadana jawaab ila quman aan isku waayay. Waxaa cabsi igeliyey markey igu soo dhacday fikrada ah inaan aniga sabab u noqon karo dumitaanka reerkiisa, waxaan maalin sheeko kusoo maqlay suuqa nin islaantiisu ka waalatay markii uu la guursaday gabar ka da' yar.

Jaceylka aan uqabo oo ahaa mid qalafsan awgii kama fekeri jirin in haasaawga raga iyo dumarka dhexmara uu ina dhexmaro, balse waxaan ka fekeri jiray dumitaanka reerkiisa waxa uu u keeni karo, iyo sida uu isaga u saameeyn doono noloshiisa. Ma aanan jecleyn inuu Cilmi noqdo mid khasaara ama mid u dhibaatooda aniga wax aan sababay.

Waxaase marwalba maskaxdeyda ku cadeyd in aanan dooneynin inaan reerkiisa aniga aan sabab u noqdo, oo aanan dumin. Ama aanan yeelin waxuu ama isaga iigu soo dhawaado sida raga iyo dumarka isgeeya iskugu soo dhawaadaan ama ay Sahro igu saluugto oo igu tuhunto inaan seygeeda wax la wado.

Waxaan maalmihi dambe cashada ugu dhiibi jiray gabdhihiisa si ay maktabada ugu geeyaan, oo markaa aanan is arag aniga iyo isaga. Ama waxaan Qaali ka

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

codsan jiray inay iyada u geeyso, waxaan markaan cashada kariyo oo loo geeyn rabo ku marmarsoon jiray habeenba wax cusub, sida in lugta iyo sinta halka ay iska heystaan i kala boodeen oo aanan salaanka kori karin, ama inaan rooti foornada kasoo hilmaamay oo aan degdeg u baxayo ama wixi kaloo markaa niyadeyda kusoo dhaca.

Markuu kasoo noqday doorashadii, waxaan filayaa inuu ku guuleeystay ama uu ku qanacsanaa natiijada uu gaaray. Maxaa yeelay wuxuu habeen ku casumay gurigiisa rag iyo dumar badan oo tiradoodu gaarayeen ilaa tobaneeyo. Waxaa xafladaas qaban qaabadeedu bilaawday labo cisho ka hor habeenka ay imanayaan martidu. Maalintii koowaad waxaa lasoo iibiyey cuntada inteeda aanan halaabeeynin hadey guriga taalo. Waxaa aniga ma ahee shaqada wax ka caawinayay, Qaali, waardiyihi guriga, iyo labo gabdhood oo aniga da'deyda ah oo lasoo qoray inta xaflada howsheedu socotay.

Maalintii labaad waxay Qaali iyo Sahro taagnaayeen qolka weyn ee fadhiga, halkaa oo ay ku wada falanqeeynayeen in neef nool lasoo gado iyo in hilib diyaar ah kawaanlaha laga dalbo. Waxayna ku heshiiyeen

www.bilehashi.se

in hilib diyaar ah kawaanlaha laga dalbo. Subaxaas waxaa guriga shaqo lagu bilaabay arooryadi, waxaa lasoo saaray wixi dhar yaalay mid wasakh ahaa iyo mid nadiif ahaaba, daahyadii ayaa lasoo dejiyey, go'yaal iyo wixii miisaska ku goglanaa ayaa lasoo dhul dhigay, daaqadihii qolalka ayaa la wada balaqay intaan daashka dharka ku dhaqeynay aniga iyo gabdhihi lasoo qoray mid ka mid ah. Gabadhi kale oo labadeena dhowr sanadood naga weyneyd iyadu way naga nasiibxumeyd oo waxaa loo diray inay dhulka labada dabaq ah rugto, oo sujaayadaha dhulka yaala iyadaa loo xil saaray inay dhaqdo oo dhigto kolkeey qalalaan, waxaa lagu yiri qol jiif, mid fadhi, maqasiin, musqul, kushiin iyo salaankaba adigaa ka mas'uul ah nadaafintooda. Markaan aniga iyo tii ila shaqeeyneysay aan howsheeni bognay waxaan Qaali ugu tagnay kushiinki oo bilaawnay in aan cuntadii diyaarinteedi galno.

Sahro waxay daashka la fadhiday Seygeeda oo maalinkaa guriga joogay oo martida sugayay, Waxaan fiiqnay bataatiyo, karooto, bocor, baamiye, basal, toon, yaanyo barbarooni, waxaan soo saaranay dusuud waaweeyn oo biyo ku shubnay, inteey biyuhu karayeen waxaa yimid hilibkii laga dalbay kawaanlaha, waxaan galnay inaan jarjarno hilibkii qaar waxaan

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

ka dhignay kuwo la shiili karo, qaar kuwo yaryar oo afka lagu ruugi karo, qaar iyagoo lafaha ku dhegen ayaan dhinac dhiganay, waxaan bakhaarka guriga ka doonay nus loor bariis ah oo intaan jawaanki ka gedinay biyo la dhignay si uu u dhaqmo.

Dhowr mar ayaan u istaagay inaan Sahro u geeyo Ardo oo xageena usoo guurguuratay. Markaan u geeyey iyadoo daashka fadhisa ayaa Cilmi oo dhinac fadhiyey i amray inaan isaga dhabta usaaro gabadha. Sidii markaan yeelay ayaa waxaa lasoo garaacay ganjeeladi oo markaa meel wejigiisa ku aadan ahayd, wuxuu iyiri albaabka fur.

Waan furay. Waxaa iga hor yimid Macoow oo gaari gacan kuwada dhowr sanduukh oo ay ku jiraan cabitaanki laga dalbay dukaankooda. Wuu isalaamay aniguna waan ka qaaday. Waxaan u tilmaamay inuu jikada geeyo sanduukhi uu gacanta ku hayay, markuu isoo dhaafay ayaan xagii gaari gacanka u daba maray oo sanduukh ay ku jiraan labo iyo toban dhaloo faanto ah soo dhifsaday, xagii aqalka ayaan soo galay oo jikadi markaan usii waday sanduukhi aan gacanta ku waday ayuu iga horyimid isagoo sanduukhiisi geeyey, wuu ii dhoola-cadeeyey oo iga qabtay sanduukhi. Waxaan eegay xagii Cilmi waxaan indhihiisa ka arkay inuu ka hinaasayo sida wiilku iigu dhoola cadeeyey.

www.bilehashi.se

Ma daneynin waxaan sii watay inaan hortiisa sii maro oo soo maro anigoo sanduukhyadi Macoow wada.
Ma isagaa hinaasay mise aniga?, ma garanayo, ma isagaa Macoow inaan taageero ka hinaasay, mise anigaa ka hinaasanaa inuu Sahro dhinac fadhiyo halka aan aniguna ku dhididayo howsha gurigiisa, oo waxaan islahaa tusi inay jiraan cid aan isaga ahayn? Ma waxaan islahaa tusi inaad ka maaranto, tusi inaad dareensan tahay in Sahro kaa muhiimsan tahay. Dabcan way iga muhiimsan tahay oo iyadu xaaskiisa iyo caruurtiisa hooyadood ayay ahayd, aniguse maxaan ahay? Jaariyad la bedeli karo markii ay damcaan. Oo reer kale ayay u tagayaan oo gabadhooda oo jikada qado ku karineysa ayay soo kaxeeysan karaan!. Intaan sii hor iyo gadaal socday talaabadeydu way cusleyd, madaxeygana waxaa isku dhex dhaafayay canaan, caay, iyo ciil sida aan halka uu fadhiyey aniga u hor iyo gadaal dhaafayay oo kale. Sidaa oo ay tahay hadana waxaan ku raaxeeysanayay dareenka ah inaan caawinayo Macoow halka uu Cilmina iga eegayo.

Goor ay qoraxdu sii dhaceyso, cirkuna caad la'aan yahay ayay martidu soo bilaabatay, waxaa yimid nin iyo naag aan islahaa waa laba isqaba sidey Cilmi iyo Sahro isku qabaan, dhar xariir ah ayay naagtu ku labisneyd, waxaa luqunta iyo gacmaheeda kasoo

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

laalaaday dahab aanan weligey arag badnaantiisa iyo weynaantiisa ruux sita maalintaa kahor, kabo taako dhuuban oo nuuraya ayay xirneyd, waxaan isweeydiiyey in Sahrana kabaheeda oo aan galabtaa u buraashay caawa sidaa u nuuri doonaan. Timaheeda way qaawanaayeen naagtu waxayna kasoo laalaadeen qoorteeda oo markaa in badan laga arki karaynin. Kor iyo hoos ayaan u eegay naagti martida ahayd iyada oo aanan ii jeedin, waxaan u barbardhigayay Sahro, way ka gaabneyd Sahro laakiin ka midab furneyd kana dhuubneyd. Ma ogi inay caruur laheyd iyo in kale. Ninkeeda waxaa qolka fadhiga u hogaamiyey Cilmi, halka ay islaantuna qol kale ugu raacday Sahro. Dhowr kale oo martidi lasugayay ahaa ayaa sidaas oo kale uyimid iyagoo labo labo iskula socda, waxaase xitaa yimid kuwo keli ahaa oo rag wada ahaa.

Cashadi ayaan soo hordhignay martidi iyo reerki, waxaa shaqadaa qabanayay aniga oo madax u ahaa labadii gabdhoodee lasoo qoray. Martidu waxay fadhiyeen daashka guriga oo maalintaa loo sharaxay sidi qol korka ka feydan, waxaa nalal laga soo jiiday gurigi, miis dheer ayaa casarki loo goglay oo in badan laga shaqeeyey, maadaama fiid ay ahaydna waxaa jiray neecaaw xaada ruxeysa.

www.bilehashi.se

Waxaan geeynay, cuntadi oo iskugu jirtay hilib shiilan, mid jaran , baaquliyo waaweeyn oo bariis ku jireen, khudaar shiilan iyo mid la cusbeeyey, mid isku taala iyo mid jarjaran, waxaa miiska dheer lagu sharaxay qare, cambe, tufaax, babaay, mandariini, liimo dhanaan, canab, moos iyo ubaxyo qurxiya. Intey cunayeen, waxaan aniga iyo labadii gabdhoodee aan madaxa u ahaa heegan ku ahayn jikada oo aan ku sugeynay inaan kasoo aruurino weelasha, waxaan fadhiyey daaqada jikada meel u dhow oo aan ka eeganayay. Waan sugayay inteey cuntada ka dhameeynayaan, waxaanse ku mashquulsanaa inaan eego Cilmi iyo Sahro oo isdhinac fadhiyey. Habeenkaa aad ayay u qurux badneyd, dhar aanan ku arag iyo waxay xirneyd dahab aanan ogeyn inuu gurigeena yaalo, way ila dhuubatay, oo ila dheeraatay, aad ayay udhalaaleysay habeenkaa. Markeey Cilmi dhinaciisa taagan tahay waxaad mooday inay iyada xoogaa ka dheer tahay, balse dhabtii waxaan ogaa inuu in yar isaga ka dheeraa.

Waxay dhex fadhiyeen martidooda, oo ay qoslayeen wakhtiga intiisa badan ee cashada ay cunayeen. Waxaan dareemay dareen qalfsan anigoo jikada daaqadeeda garabkeygu ku tiirsan yahay markay indhaheeygu qabteen Sahroo qosleysa, ilkaheeda cadcadaa ayaa

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

indhaheyga cawiray, inkastoo aanan maqleeynin codkooda, hadana waxaan arkayay inay gacanta cabitaan ku heyso oo ay qosleeyso, ilkaheeda cad cad iyo waxaa un ii muuqday inuu madaxeeda u saaran yahay garabka Cilmi. Waxaan is arkay anigoo madaxa saartay derbigi daaqada sida uu Sahro madaxeedu ugu saarnaa garabka Cilmi. Waan kasoo booday derbigi oo eegay dhinacyadeydi sidii in gabdhaha jikada ila joogay ay garteen waxa aan ku fekerayo.

- Maxaa kugu dhacay? Ayay midood i weydiisay

- Waxba! ayaan iri oo ku amray inay diyaariyaan macmacaanki maadaama aan arkay inay cashadi dhameeyn rabaan, waxaan saxamo waaweeyn kala saarsaarnay macmacaanki, oo iskugu jiray doolsho, xalwad, buskutyo kala duwanaa, khudaar la jarjaray oo baaquliyo yaryar aan ku kala gurnay, waxaan soo saarnay cabitaanki qaboobaa uu Macoow keenay, waxaan safnay koobab yaryar oo lagu cabo cabitaanka kulul sida khaxwihi iyo shaahi,

Habeenkaa waxay martidu baxeen iyagoo qanacsan aniguna waxaan seexday anigoo daalan.

*

www.bilehashi.se

Maalintii xigay sidoo kale howl iima yareeyn, oo waxaa la kala nadiifinayay weelashii, dharkii iyo dhulkii ay martidu ka tageen. Waxaan soo toosnay aniga iyo labadii gabdhood oo qolkeyga darmooyinku u yaaleen goor ay arooryo tahay, waxaan ka bilawnay jikadi iyo maacuuntii xalay ay martidu ku casheyeen oo laga gaari waayay in la wada dhaqo, hadana dharkii ayaan dhaqnay oo kala warrnay markaan intaa yeelnay ayaan bilownay dhulka inaan u rugno sidi intaanun martidu iman, waxaan anigu ku dhaafay shaqadi labadii gabdhood oo suuqa ayaan u aaday si aan u soo adeego qadadi maalinkaas.

Waxaan suuqa isku aragnay hooyadeey oo aan xasuusiyey in caawa ay tahay khamiis jimce ay soo galeyso oo aan beri iman doono guriga. Waxaan u sheegay xafladi xalay aan qabnay iyo howshii badneyd. Garabka ayay ii salaaxday oo tiri markaad guriga timaa-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

did ayaad nasan doontaa hooyo!. Waxay iyaduna iiga farxisay inay Maano guriga joogto oo ay joogi doonto wiigaas oo idil maadaama reerki ay u shaqeyneysay uu safar ku maqan yahay oo fasax todobaad ah lasoo siiyey.

Markaan soo noqday waxay Qaali igu andaceeysay inaan kas iyo maag suuqa ugu soo daahay maadaama aan ogaa inay gabdhaha howsha wadaan. Waxaa isku soo aaday markaan gurigi soo galay iyo iyagoo dhulkii rugidiisi bogay. Ma aanan u sheegin inaan hooyadeey suuqa kusoo arkay, mara rabin inaan cidna la murmo markaas, oo waxaa iga muuqday farxad. Waxaan ku iri saf dheer ayaa loogu jiray kawaanlaha, islaamihi caanahana waxbadan ayaan sugayay maadaama ay la murmayeen munishiibiyo canshuur badan ka rabtay.

*

www.bilehashi.se

Waxaan arooryadii subixi jimce imid gurigi waalidkeey, waxaan ugu imid Maano, Ibaraahin iyo hooyo iyo aabe oo wada jooga. Waxaan isku ciilay inaan aniga keligey reerka ka maqnaa. Waxaan ximiyey Ibraahin oo weli aanan shaqo magaalada ka helin oo hadana nasiibkiisu siiyey inuu aabe iyo hooyo maalin walba la joogo, inkastoo hadana arrin fiican aan u arkey inuu wehlinayo reerka, weliba aabe, hadana waxaan jeclaa inaan aniga la joogo iyaga.

Markaan quraacanay waxaan aniga iyo Maano isku raacnay suuqi, aad ayaan iskugu faraxsanayn inaan is aragno wakhti dheer ayaan kala maqneyn. Waxaan sii marnay wadooyinkii aan markaan caruurta ahayn ku cayaari jirnay, ceelki aan biyaha kasoo shuban jirnay anagoo hooyo gacanta heysana berigaa, ayaan saaka labadeena biyaha iskala soo shubnay, waxaan dhinac marnay anagoo weli suuqi usii socona iskuulki aan

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

labadeenaba fasalka todobaad ku gaarnay. Markaan guriga kusoo noqonay waxaa guriga hortiisa ku cayaarayay gabdho yaryar oo deriska ahaa oo xarig ku boodboodayay, wadada ayay nooga leexdeen markey arkeen in dad waaweeyn agmarayaan.

- Eedo maxaad soo gadeen? Ayay midood ina weydiisay iyadoo dambiilaheena soo eegeysa.

- Hoos ayay Maano ugu foorarsatay gabadhii oo tustay qare barkiis oo naloo soo jaray oo dambiisheeda ku jiray.

- Eedo waxyar noo goo qaraha! ayay mid tuugtay Maano.

- Hadaad dhaladaa meesha ku jabtay aruurisaan oo aad geeysaan meel aan dadku mareynin, aniguna gurigaan galayaa oo idiin keenayaa qaro jarjaran!. Ayay Maano ku tiri gabdhihi intey farta ugu fiiqday dhalo cabitaan laga dhameystay oo u ekeyd inuu gaari dul maray.

- Waayahay Eedo! Ayay gabdhihii ukala carareen inay dhaladii wadada ka aruuriyaan.

Aad ayaan ula dhacay sida ay Maano sidi qof weyn ugu dhaqmeyso iyo sida ay caruurta ugu roon tahay, inkastoo aysan Maano wax sidaas ah aniga iga weyneyn hadana waxey u dhaqmi jirtay sidi islaan weyn, waxey ahayd ruux degen ilaa caruurnimadee-

www.bilehashi.se

di, aniga waxaa reerkeena la iigu yeeri jirey markaan yaraa " biibeey" waxaan ahaa caruurta fudfudeydka lagu sheego, halka Maano iyo Ibraahin ay ka ahaayeen caruurta degenaanta lagu tilmaamo.

Fiidkii markaan qolka keli ku noqonay aniga iyo Maano, waxaan kala jiifnay sariiraheeni aan kala jiifan jirnay berigaan yaryareyn, waxaa weli firaaqo ahayd sariirti Mulki. Aabahey wuu diiday in la iska iibiyo sariirteeda, sidaa oo ay hooyo soo jeedisay, xitaa iyadoo hada mudo sanad iyo bar ah mootan hadana sariirteeda waxey u goglaneyd sidi inay usoo noqoneyso. Aabahey caruurtiisoo idil wuu wada jeclaa, mid walibana si gooni ah ayuu u jecel yahay ayuu dhihi jiray, waxaase hooyadey kula xifaaltami jirtay inuu Mulki ugu jeclaa caruurtiisa. Ma ogi inay xifaaltanka hooyo wax kale ku jireen laakiin xitaa markii Mulki ay dhimatay aabe ayaa reerka ugu dheeraa xilliga uu u barooranayay darteed. Mase dhihi karo taas waxay cadeyn kartaa inuu iyada naga jeclaa inteena kale, iyadu waxay ahayd caruurtiisa mida ugu yareyd, anaguna waan nool nahay oo ma dhiman markaa ma isku barbar dhigi karo jaceylka uu noo qabo iyo kan uu Mulki u qabay.

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Mulki iyo aniga waxaan habeenkaa kala wareysanay reeraha aan u kala shaqeeyno iyo sida nolosheenu kala tahay. Waxaan uga sheekeeyey reer Cilmi iyadana waxay iiga sheekeeysay reerka ay u shaqeysay oo iyagu ahaa reer qalaad oo ninku wuxuu ahaa talyaani, wakhti dheer ayay ku qaadatay inaay ii furanto oo iisheegto waxa ay uurka ku heysato.

Waxey tiri waan ku faraxsanahay inuu isoo fasaxay doorkan, waayo doorki hore wuu ixumeeyey. Markuu xaaski iyo caruurtiisi uu u diray fasax waxaa guriga kusoo haray aniga iyo isaga. Inta badan isma aanan arki jirin oo wuxuu guriga u iman jiray qadada, markuu cuno saacad ama labo ayuu seexan jiray hadana wuxuu u noqon jiray shaqo, wuxuuna kasoo laaban jiray fiidki markaan cashada siiyana waan iska seexan jiray.

Waxaan dareemi jiray cidlo inteey caruurta iyo xaaskiisu guriga ka maqnaayeen. Waxaase habeen habeenada ka mid ah uu iga codsaday inaan cashada la cuno. Aad ayaan uga naxay codsigiisaa, waayo weli sanadihii badnaa ee aan la noolaa kuma cunin cunto qolka ay iyagu wax ku cunaan, markaan miiska lasoo fadhiistay waxay indhaheygu eegayeen cuntada miiska saaran, ama shumaca miiska uu ka dul shiday habeenkaa. Waxaan islahaa armaad cuntada ku margataa oo waxaan hilmaamay inaan ruugo oo si fiican

www.bilehashi.se

u calaanjiyo. Waxaan ka cabsanayay inuu waxaanan karin uu iweeydiisto.

- Wax eysan karin! Waan iska fahmay waxay Maano ula jeedo, mana weydiinin oo ma rabin iney qeyb sheekada iga qariso.

Markaan cashadi bognay ayuu iga codsaday inaan cabitaan khamro ah talaagada uga soo saaro oo qolka fadhiga ugu keeno. Markaan ugeeyey waan kasoo dhaqsaday oo waxaan ku marmarsiyooday in shaah aan anigu karsanayay iga gubanayo. Daqiiqado badan kadib ayuu ii dhawaaqay misna inaan u imaado, markaan qolki soo galay wuxuu fadhiyey kursigi aan ku ogaa, waxaa hortiisa yaalay dhowr dhalo khamri oo maran, wuxuu iga codsaday inaan labo dhaloo kale u keeno, sidii ayaan uyeelay, markaan usoo noqday oo cabitaanki labaad u keenayo wuxuu calaacashiisa ku dhuftay dhowr jeer halkuu salka ku hayay agteeda.

- Soo fadhiiso! Ayuu i amray.

Aniga oo jirkeygu gariirayo ayaan soo dhinac fadhiistay, codkiisu wuu labnaa, aniguna waxaan islahaa xageed uga baxsan kartaa waakan aad labadiina guriga ku tihiinee. Wax badan ayuu keligiis iskula qoslayay sheekadii uu sheegayay oo aanan dhageheyga fasiri karin markaa maadaama sidii ruux la maray uu u hadlayay codkiisuna labnaa. Waxaan ka warhelay gacan-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

tiisi oo garabkeyga saaran, waan ka yara durkay, wuu iga soo daba durkay oo wejigiisi ayuu wejigeygi usoo dhaweeyey, markuu arkay indhaheyga naxsan ayuu jirkiisi oo idil isoo dul saartay……no…no….no Roberto… ayaan qeyliyey oo marqudha intaan isagiyoo idil kala tuuray ayaan qolkii ka cararay sidii waxar libaax raba inuu cuno ka carareysa, intuusan soo istaagin oo uusan iga soo daba cararin wuxuu suxulkiisa iyo gacantiisa inta u dhaxeysa ku masaxay wixii miiska saarnaa, isagoo u qeylinaya sidi libaax cadheysan sidiisi. Waxaan u cararay qolkeygi oo hoosta kasoo xitray. Xoogaa markuu igu gargaraacay aniguna aan sariirteyda ku ooyayo oo ku alla baryayo inuusan igu soo jabin albaabka ayuu iska tagey.

Subaxii xigay iyo ilaa ay xaaskiisa iyo caruurtu kasoo noqdeen waxaan ku noolaa cabsi iyo ciil. Sidii askari dagaal ku jira oo dhulka loo miineeyey ayaan talaabadeyda u ilaalin jiray inay udhawaato meel uu joogo. Waxaan neefta neefsan jiray markuu guriga ka maqan yahay. Ragu waa sidii libaax oo haduu mid dayacan meel ku helo wuu ka faa'ideystaa markiiba! Ayay iyadoo carreysan ii digtey.

Waan ka naxay dhibaatada walaasheey la mariyey, waxaana intaanan habeenkaa kala gam'in jirkeyga

www.bilehashi.se

jiriirico ku taagay markaan Cilmi geliyey booski Roberto oo aan mala-awaalay hadii sidaa anigu igu dhici lahayd tolow sideen yeeli lahaa?.

Markaan guriga reer Cilmi aan usoo noqday fiidkii sabtidu soo galeysay, waxaan tuhun ka qabay Cilmi, waxaa maskaxdeeyda saameeyey sheekadi Maano iisoo sheegtay, talaabo walba, erey walba uu Cilmi yiraahdo ama sameeyo ayaan tuhmayay ayaamo badanoo xigay habeenkaa aan sheekada walaashey dhageystay.

Maalintii xigtay ayaan arkay wejigiisa isagoo careysan markii ugu horeeysay intaan la noolaa Cilmi iyo reerkiisa. Waxaan maalintaa kariyey qadadi. Anigoo diyaarinaya ansalaatadi oo miiska jikada ku jarjaraya khudaarti ayaa Istar jikada iigu soo gashay oo ii sheegtay inay hooyadeed ii baahan tahay oo hada u tagaa. Waan naxay oo waxaan soo xasuustay maalintii ay sidaas oo kale iigu soo gashay oo la ii qabsaday dhegodhego aanan wax ka ogeyn.

- Oo qadadi ayaanba kala ridi rabaaye maxey iga rabtaa hada? Ayaan weydiiyey.
- Ma ogi! Ayay itiri laakiin kor ayay kugu sugeeysaa ee dhakhso!.
- Salaankii qolkeeda igeeynayay ayaan u socod boob-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

siiyey oo aan isiri inteysan caroon utag, markaan u tagay waxay itiri aniga kuuma yeerin.
- Istar ayaa igu tiri waad isugeysaa!
- Istar?
- Haa!
- Istar anigu ma arag waxna uma dirsan ee socoo shaqadaada qabso wakhtigi qadada waa lagaaray oo hada ayuu Cilmi miiska soo fadhiisaneyaa'e. Ayay igu tiri iyadoo aanan dan iyo xiiso siinin warkeygi.
Markaan jikada usoo noqday anigoo yaaban waxaan arkay Istar oo jikada kasii baxeysa, waan weydiiyey meeshay hadalkaa kala timid.
- Anigoo qolka fadhiga ayaan maqlay codkeeda! Ayay iigu jawaabtay oo iga sii dhaqaaqday.

Markaan arkay in reerki oo idil miiska fadhiyaan oo aniga isugayaan ayaan kala geeyey qadadi aan maalintaa u kariyey, labo baaquliyoo waaweyn oo suugo ah ayaan dhexda u dhigay, saxamada iyo qaadooyinka iyagu hore ayay miiska usii saarnaayeen, hadana jikadii ayaan usoo noqday oo labo baaquliyoo bariis cad ah geesaha kala dhigay, hadana saxankii weynaa ay khudaratu ku jirtay, iyo kii hilibka shiilnaa, iyo jeegagi cabitaanka ahaa.

Markaan jikada kusoo noqday, intaanan salka dhulka

www.bilehashi.se

dhigin oo aan isleeyahay cunto cun , ayaan maqlay ruux inuu matagayo iyo inuu waxuu nacay tufayo aanan dhagaheygu markaa kala fahmin. Waxaan u cararay halkii ay fadhiyeen, waxaa u imid indho isoo wada eegaya, iyo Sahro oo codkeedu uu dheereeyo.

- Naa maxeey aheyd waxaad noo keentay?
- Waxee?
- Waxee? Kaalay ayay ii yeertay, dhadhemi suugadaan?
- Waan dhedhemiyey oo anigoo weli afka ku haya waxaan itiri dhedhemi ayaan jikadi u cararay oo iska soo tufay, waxaa ka buuxay suugada cusbo aanan loo qiyaasin. Waxaan hubay in aanan anigu sidaa cusbo ugu shubin suugada, dib markaan baaquligi suugada ugu noqday waxaan arkay in cusbo badan salka fadhi-do, waxaan isha lasii raacay saxanki u xigay oo ahaa kii hilibka shiilnaa uu ii saarnaa, waxaa ishu qaban kartay in cusbadu weli ka dul caddahay hilibka du-shiisa. Waxaa lagu shubay markaan kariyey kadib! Ayaan fahmay markiiba.
- Aniga cuntada sidaa uguma shubin cusbada! Ayaan iri anigoo is difaacaya, oo indhaheygu kusii jeedaan kuwa Cilmi oo aan islahaa wuu kuu maciinayaa.
- Hadaa yaa sidaa ugu shubay? Ayuu Cilmi i weeydii-yey sidi ruux aniga i tuhmay. Waan ka carooday inuu

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

isaga iweydiiyey su'aashaa.
- Ma ogi! Ayaan iri anigoo ilmadu indhaha ii taagan tahay. Ma ogi…waa Istar! Ayaan farta ku fiiqay iyadoo hooyadeed dhinac fadhisa.
- Istar? Ayay hooyadeedna difaacday
- Oo Istar miyaa cuntada cida u karisa? Ayay Qaali tiri iyadoo iga sugin inaan u sharaxo inaan iyada tuhunsanahay oo markaan qadada kala ridayay ay ii dirtay hooyadeed oo aan ii baahneeyn, markaan soo noqdayna aan arkay inay jikada kasii baxeysay.
- Maya, laakiin jikada ayay iigu soo gashay oo…. waan isku yaryaraaday oo waxaan dareemay sidi tuug guriguu usoo dhacay ugu yimid kii lahaa!.

Miiski ayuu ka sare istaagay Cilmi oo hadana intuu sii socday yiri; hada maxaan ku qadeynaa?. Isagoo xanaaqsan. Afki ayaan furay oo hadal kasoo bixi waayay. Geesaha ayaan eegay, waxaan arkay indhihi Qaali iyo Sahro iyo caruurti oo jawaab iga wada sugaya. Maxaan ku qadeynaa?

Markii ayaan galay jikadi oo isku diyaariyey qado kale, hilibki karsanaa ayaan cusbadi ka jafay, oo biyo kulul ku kariyey oo xawaaji dul mariyey, bariiski ayaan daadiyey oo baasto saartay dabkii, suugo cusub

www.bilehashi.se

ayaan kariyey oo goor ay casar ku dhowdahay isugu yeeray inay miiska yimaadaan.

*

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Waxaa kasoo wareegay wakhti dheer dhacdadaa markaan subax lasoo toosay qoorta oo idhegen oo aanan labada dhinac u leexin karin, waxba ma leh ayay Qaali igu tiri, oo markaad socsocotid oo dhiigaagu kululaado way iska fiicnaan doontaa, laakiin ma fiicnaan ilaa casarkii ayaan maalintaa oo idil xanuunka ku shaqeeynayay, waxaa iigu darnaa markaan u foorarsado baafka aan dharka ku dhaqayay. Casarki markii ay qoraxdu qabowday wuxuu xanuunku kusii fiday ilaa iyo dhabarka intiisa kore iyo garbaha.

Waxaa iga wareeystay Macoow oo aan usheegay xanuunka aan lasoo toosay, wuxuu iisheegay inaan masaajo iyo daliig u baahanahay, wuxuu isiiyey dhalo ay ku jirto subag caraftiisu kulushahay, marso markaad seexanayso oo dhar badan isku dad!, ayuu iisharaxay

www.bilehashi.se

sida daawadaa loo isticmaalo. Waan ku mahdiyey, waana jecleystay sida uu iiga taxadarayo.

Markaan guriga imid ayaan isku daliigay ilaa aan kuleylka subaga la dhididay. Subixii dambe markaan soo toosay qoortu way dhaantay intii xalay. Waxaan isweeydiiyey Macoow inuu sidaa ii dhaqaaleeyn doono xitaa hadaan xaaskiisa noqdo, iyo in naxariistiisu tahay mid soo jiidasho un ka ah.

Waxaan sidii caadiga ii ahaydba u barbardhigay naxariista Cilmi uu ii naxariisto. Ma dan gaar ah ayuu Cilmi iga leeyahay?, ayaan isweeydiiyey, ma hubin jawaabta su'aashaas, mana is oran guur ayuu kaa doonayaa, waayo waxaan ogaa inuu xaaskiisa jeclaa, waxaan ogaa siduu u dhaqo, ugu dulqaato, ugu roon yahay, waxaanse isweeydiiyey aniga muxuu sidaa iigu roon yahay hadaba?. Ma aniguu ijecel yahay? mise Sahruu jecel yahay?. Mise labadeenuba wuu na jecel yahay? Waxaan xusuustaa maalin aan jiraday oo aan shaqeyn kari waayay, subixii halkuu shaqada ka aadi lahaa ayuu aniga ii qaaday dhakhtarka, wuxuu i kortaagnaa intuu dhakhtarka i baarayay, wuxuu i dhinac fadhiyey intey kalkaalisadu dhiiga iga miireysay. Waxaan dareemayay markaas iyo marwalboo aan agjoogo isaga kalsooni iyo naxariis. Waxaa su'aal adag

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

oo aan jawaab laheyn igu noqotay sababta uu sidaa iigu naxariisto?, xitaa Qaali waxay ii sheegtay inuu ii dhaqaaleeyo si uusan gabdhihii hore ee reerka u shaqeyn jiray uusan u dhaqaaleeyn jirin.

Waxaan habeenkii dambe isku reebay qolka maktabada oo aan caruurtiisa wax ugu dhigeynay aniga iyo isaga oo waayahaan dambena aniga uu igu bari jiray xisaabta marka ay caruurtu baxaan. Aad ayuu ii dhiirigelin jiray markaan saxo, markuu casharku igu adkaadana wuu ii dulqaadan jiray oo dhowr mar ayuu ii meerin jiray oo intii sharaxaad ah oo aan u baahanahay ayuu isiin jiray.

- Maxaad iigu naxariisataa?. Ayaan weydiiyey su'aal qalafsan oo uusan iga filaneynin habeenkaa.

- Maxaad i weeydiisay? Ayuu iweydiiyey isagoo aanan kala hubin in su'aashu kasocoto xisaabta uu markaa ibarayay iyo in kale.

- Waad ii naxariis badan tahay, mar walboo la i maago gurigaan adigaa iga hortaagan oo i difaaca, waxaad ii dhaqaaleeysaa sida xaaskaaga, waxaad iisoo iibisaa waxaad isleedahay wey u baahan tahay, waxaad igeeysay dhakhtar, waxaad i bartay wax walboo gabar da'deeyda ah la baro, waxaad iga wareeysataa reerkeeyga, waxaan isweeydiiyey waxaad sidaa iigu roon tahay? Ee maxaad sidaa iigu roon tahay?. Ayaan

www.bilehashi.se

su'aalay anigoo codkeeygu yahay sidi inaan la hadlayo ruux qeeyrkeeyga ah.

Inta aan tirinayo abaalka uu iigalay indhaheyga ayuu eegayay, waxaa kuwiisa ka muuqday iney ku mashquulsan yihiin inta u dhaxeysa halka timaha iyo wejigu ku kulmaan ilaa bushimaheyga.

Aamusnaan dheer ayaa raacday. Waxaan filayaa inuu eegayay wejigeyga halka aan aniguna ka eegayay buuga iyo waraaqo hareerahiisa yaalay oo aan jawaabteyda ku sugayay.

- Horta waan ku faraxsanahay inaad abaal iiga heyso inta aan kuu qabtay – ayuu hadalkiisii ku bilaabay – waxaan kor usoo yara qaaday madaxeyga si aan u eego indhihiisa.

- Ma i jeceshahay? Ayaan su'aal qalafsan weydiiyey oo markiiba ka shalaayay inaan sidaa toosan u weydiiyey

- Waan ku jeclahay, haa!, Waxaanse filayaa inaadan khalad ka fahmin jaceylkeyga aan ku jeclahay, waxaan kuu jeclahay sida gabdhaheyga, waxaan ahay waalid sida aabahaa iyo hooyadaaba, waxaan rabaa inaan kuu dhaqo sida ay iyagu kuu dhaqi lahayeen hadii ay fursada aan anigu heysto oo kale heysan lahaayeen, waxaana kaaga helay sida aad shaqada guriga uga soo baxday iyo sida aad gabdhaheyga wax u

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

bartid, waad aragtoo markaan aduunyo kale ku mashquulo adigaa wax udhiga. Sow sidaa ma aha?
- Haa, ayaan iri anigoo isku ceebsaday su'aashaan weeydiiyey.
- Sow ruuxii isxaan kuu fala in loo abaal gudo ma aha?
- Haa!
- Sida Sahro iyo reerka intiisa kaloo dhana inaan waxaan isleeyahay wey u baahan yihiin idiinkugu soo iibiyo waa waajib iga kaa saaran, oo anigaa reerkaadi kaasoo watoo aad ila nooshahay.

Markiiba waan isla yaryraaday, oo damcay inaan kursiga ka istaago oo qolkeyga u cararo. Balse wakhti dheer ayuu ii sharaxayay in laba ruux ay iska heli karaan xitaa iyagoo aanan wax haasaawe ah dhexdoodu jirin.

Markaan habeenkaa sariirteeyda imid waxaan dareemayay sidi ruux in badan usoo socday meel oo markuu yimid ogaaday inaysan oolin wixii uu kasoo doonay.

Xiriirkeenuna maalintaa kadib ma ka fududaan ee sidiisi ayuu u qalafsanaa, waxuu habeen maalmahaa u dhawaa oo aan xaflad qabnay iisoo iibiyey goono iyo

www.bilehashi.se

shaar dheer oo jilbaha ii tagayay. Wuxuu yiri ku lebiso oo yaadan martida ka muuqan habeenka xaflada!. Wuxuu igu siiyey qolka maktabada markuu casharki habeenkaa noo dhamaaday. Bacdi ayuu ka furay oo yiri suuliga maktabada la gal oo isoo tus sidaad ku tahay bal inaan soo bedelo iyo inuu kugu wacan yahay aan arkee. Wuxuu igu sugay qolka aniguna waxaan u dhaqaaqay xagii suuliga oo albaabkiisu ku dhex yaalay qolka maktabada.

Waxaan ku hormaray shaarki oo la hor istaagay miraayada horteeda, oo intaan xabadka dushiisa saartay miraayadi u dhoola cadeeyey, dhinac ayaan dhigtay oo hadana goonadi soo qabtay iyadana anigoon weli gashan isku eegay. Diracii ii xirnaa ayaan iska siibay oo dhinac iska dhigay, funaanad aan gacmo laheyn ayaa iiga hooseeysay, waan eegay oo isiri tolow iyadana ma iska siibtaa, hadana waxaan goostay inaan hoosta ka qabo oo ileyn shaarka cusub umbaa dusha laga arki karaaye. Waxaan faraha la galay timihi oo aan isiri timahana ha u ekaadaan inay hagaajisan yihiin, anigoo weli faraheygu timaha ku dhex jiraan qaarkeyga hoosena qaawanahay ayaa waxaa ii muuqday inuu ilinka suuliga taagan yahay, garabkiisa ayaa waxuu ku cugsanayay albaabka suuliga oo nus balaqnaa. Markiiba anigoo naxsan ayaan diracaan iska sii-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

bay naasaha iyo calooshi ku asturtay. Markaan ruuxii meesha taagnaa sii eegay waxaan arkay inay Sahro tahay.

- Haa, oo ileyn sidaanuu habeen walba wax kuu baraa?, soo bax, wax baas yahay!, anigaa dhilo shaqa-ale ka dhigtaye. Sahro oo careysan ayaa albaabki suuliga ii wada balaqday, wey diiday inay isugto ilaa aan dharkeyga kawada xirto. Aniga iyo Sahro oo qol-ka bartamahiisa ku xarbineyna ayuu Cilmi soo galay. Waxaan gadaal ka ogaaday inuu suuli ubaahday oo uu u dhaadhacay suuliga dabaqa hoose oo ay Sahro usoo daba martay qolka.

- Haa, sharaxaad iyo sheeko uma baahni, ee kala dooro caawa ama aniga ama sharmuutada!, ayay ku qeeylisay ninkeedi oo garbaha haya oo isleh bal deji.

- Aa, ala ba'ayeey, anigaa doqon noqday oo goor hore fahmi waayay waxa gurigeyga ka socda, oo waxaad mar waliba iiga hortaagneeyd oo xageeda u istaagi jirtay ileyn waxbaad la wadaagtay! Aaaaa…ayaya barooratay ilaa Qaali iyo caruurti qolka noogu soo galeen. Sahro waxay codsatay inuu isla habeenkaa ii diro reerkeeni, isna wuxuu lahaa meelna ma aadayso oo gurigeygeey ka shaqeeyneysaa. Qaali waxba ma oran oo iyageey kudhaaftay inay xalka helaan. Xalku-na wuxuu noqday inaan meelna la ii dirin ee guriga ka shaqeeyo kadib markuu hooyadii u usharaxay wixi

www.bilehashi.se

dhacay iyaduna way ku afgaratay.

Maalmihii xigey Sahro waxay iga mamnuucday inaan qolka ay jiiftaan nadiifiyo iyo inaan casharada habeenkii ka qeybqaato. Sidaa darteed habeenkii xilligi aan casharka dhigan jiray waxaan waayihii dambe aadi jiray dibeda oo aan Macoow kula kulmi jiray. Habeen xaafadiisa ayaan ku fiidsan jirnay, habeeno waxaan isku raaci jirnay shineemo iyo tiyaatar iyo meelo kaloo maadd iyo maaweelo aan utegi jirnay. Ilaa habeenkii dambe uu Macoowna fursadaa aan marwalba kula kulmayo uu ka faa'ideystay oo iweydiiyey inaan is mehersano hada maadaama aan waxbadan berigaan isbaranay aan ka weynahay, isna ka dhaqaalo roon yahay.

Wuxuu habeenkaa ii sheegay iney isbarteen walaalkeey Ibraahin, dabadeedna uu waalidkeey isbaray oo arrintiisa u sheegtay anigoo aanan ka warqabin, dabadeedna lagu xujeeyey inuu aniga iga dhameysto arrinta guurka. Waan ku qoslay oo usheegay inuu geesi yahay haduu intaa yeelay isagoo aanan aniga igala tashan waxaana ka yeelay inaan ooridiisa noqdo.

Habeenkaa uu dayaxu ifkiisu wada buuxay waxaan

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

hortaagneyn tiyaatarka hortiisa oo waxaan soo wada daawanay qiso jaceyl ah oo ay jilayeen hobolo aan aad ugasoo helnay. Niyadeeydu waa faraxsanayd markuu guriga reer Cilmi iisoo dhaweeynayay, gacmaha ayaan isheysanay waxaan hilmaamay dhibkii iyo rafaadkii, waxaan hilmaamay inaan jaariyad ahay oo waxaan isku heystay boqorad boqorkeedi gacanta heysata. Waxaa dhegeheyga soo gaarayay heeso ay heesayaan shimbiro aad u qurqurxoon, talaabadeeyda waxay u fududeyd sidi kaluun biyo dhex jibaaxaya, cirka iyo dhulka iyo inta u dhaxeysa ayaa ii carfayay, indhaheygu waxay qabtaan ayaa ila nuurayay ilaa aan sariirteyda ka imid habeenkaa.

Jimcooyinka waxaan sidii caadiga ii ahaydba u tegi jirey reerkeeyga, inkastoo berigii dambe wax iska key bedeleen, oo aanan ugu xiisi jirin sidii aan ugu xiisi jiray berigaan reer Cilmi ka shaqo bilaabay, ma ogi inay ku xirneyd inaan xaafada reer Cilmi la qabsaday oo aan ka dareemayay inuu gurigeyga yahay, iyo in hooyaadeey aanu ila sheekeyn jirin, ma ogi inay taasi sabab u ahayd cidlada ay ku nooleyd. Waxay hooyadeey kusoo baxday ruux aamusnaan badan siduu aabahay u geeriyooday. Markii lala hadlayo wejigeedu wuxuu ahaa mid maqan xitaa iyadoo hadalka dhageysanaysa. Maano weli guriga wey ka maqneyd,

www.bilehashi.se

Ibraahina guri iyo reer ayuu yeeshay.

*

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

Waxaan kala daadin rabay lacagtii kurjanka ahayd ee aan labada gacmood ku xisaabinayay markey indhaheygu qabteen Cilmi oo gadaal taagan nin aan ka iibinayay laba loor oo bur ah. Waan eegay, oo si fiican u eegay inuu isagi yahay anigoo markaan faraheygu joojiyeen inay lacagta aan gacanta ku hayay soo gediyaan, maskaxdeydu sidoo kale way joojisay inay xisaabiso lacagti. Aduunyo!, waxaa kasoo wareegay sagaal sano maalinkaan gurigiisa ka tagay.

- Waan arkaa iney xisaabti aan ku baray anfac yeelatay! Ayuu igu salaamay intuu soo dhinac istaagay ninkii aan wax ka iibinayay.

- Cilmi! Subax wanaagsan ayaan u salaan celiyey. Markaan ninki howshiisi u dhameeyey ayaan Cilmi u dalbay cabitaan qaboow, dabadeedna sheekeeysanay. Aad ayaan uga naxay markuu iisheegay in Qaali geeriyootay oo maanta lix maalmood aasan tahay, ha-

www.bilehashi.se

dana uu suuqa u yimid inuu soo iibiyo cuntadi todobadeeda lagu laabi lahaa.
Cilmi, naftirkiisi!, ayaa suuqa yimid oo soo adeegaya! Ayaa iga fajacisay mana aanan weydiin.
- Waxaan maqlay inaad furateen bakhaar oo waxaan isiri intaad lacagta meel kale geeyn lahayd gabadhaada ugee, iyaduna qiimo wacan ayay kaaga iibineysaaye!. Wuu qoslay oo iyiri; sow sidaas ma aha oo qiimo jaban iigama iibineysid?.
- Dabcan Cilmi! Ayaan u jawabay anigoo u dhoola-acdeynaya
- Oo aaway Macoowna? Ayuu iweeydiiyey isagoo dhinacyada bakhaarka ka eegaya.
- Wuxuu ku maqan yahay dekeda oo raashinbaa maanta noo soo degayay. Ayaan u sheegay.

Wejigiisa ayaan si fiican usii eegay intuu cabitaanki cabayay, waxaan arkay inuu cimri kadaba yimid, waxaa indhihiisa hoostooda ka muuqday madow wejiga intiisa kale uusan lahayn, dhabanadiisa god ayay galeen.
- Maxaad caruur yeelateen? Ayuu isu'aalay
- wiil iyo gabar.
- Maxaa loo kala bixiyey? Ayuu i su'aalay magacyadooda. Waa sidii Cilmi aan ku aqaanay caadadana u ahayd ayaan niyada iska iri inuu iga wareeysto reer-

best-selling fiction author in somali -Qoraaga loogu akhris badan yahay Qurbaha!

keeyga, waxuu isoo xasuusiyey waagaan jaariyadiisa ahaa.

- Maxamed iyo Dahabo ayaan u kala bixinay. ayaan kala baray caruurteeyda

- Maxamed waxaa u bixiyey Macoow, adna waxaad u bixisay Dahabo, sow sidaa ma aha?. Ayuu yiri isagoo farta igu soo fiiqaya oo qoslaya.

- Maxaad sidaa uleedahay Maxamed iyo Macoow inay m;da ka wada kacaan Dahabana sidi Deynabo d;da ka kacdo miyaad ula jeedaa?, waad qiyaas fiican tahay ayaan u qirtay in dhabtu sidaa ahayd.

- Sahro iyo caruurti ka waran? Ayaan su'aalay

- Caruurti? Ayuu igu soo celiyey – waa naago waaweeyn oo guur gal ah maanta ayuu yiri oo iisheegay in Sahrana ay iska fiican tahay. Wuxuu iga iibsaday labo loor oo bariis ah, iyo mid sokor ah aniguna waxaan ku casumay in aan ka bixiyo gaari gacanlaha kharashkiisa.

- DHAMAD -

www.bilchashi.se

Buugaagta kale oo uu Qoray Bile Hashi, lana mid ah Buugaan:



1. Janno
2. Deynabo
3. Sidey noqonba mooyee!
4. Maxbus Nr77
5. Hammi Aduun & Haasaawe Jaceyl
6. Xusuusqorkii Leyla
7. Shan Habeen
8. Intuu Dahabku lacagta dheeryahay Dumarka dheertahay
9. Wejibuug
10. Calaf
11. Qorbo joog & Qarax U joog
12. Mukhalas
13. Hotel Amisom

"DEYNABO" waa qiso ka turjumeysa jaceyl qalafsan oo dhex maraya

Deynabo iyo Cilmi. Deynabo waa inan da'yar oo jaariyad u noqonaysa reer qani ah, intay reerka la nooshahay waxay ku nooshahay cabsi iyo ciil ay ka qabto Sahro oo ah islaanta ay ushaqeeyso., waxaase marwalba ka difaacaya dhibka iyo xanuunka Cilmi oo ah odayga reerka, taa oo sabababeysa in Deynabo ay xiriir khaas ah la yeelato Cilmi, xiriir qalafsan iyo haasaawe heehaabya hawada labadooda dhexmareysa, xiriirkaas oo ay marwalba u barbardhigeyso xiriirka ay la yeelatay Macoow oo ah wiil da'deeda ah.

Waa qiso ka warameysa dareenka dad kala da' ah,

kala dabaqad ah, hadana noloshoodu si sikugu xiran tahay!

Bile Hashi wuxuu ka mid yahay Qoraayaasha qarnigan kuwooda loogu qadarin og yahay. Waana Qoraaga loogu akhriska badan yahay qaarada Yurub, khaasatan wadanka Sweden. Halkaa oo uu ku noolaa 1987 wixii ka danbeeyey.

Aalaaba Bile waxuu wax ka qoraa taariikhda cusub ee dadka iyo dalka Soomaaliyeed, khaasatan taariikhda qurbojoogta. Wuxuu ka qalinjabiyey Qoraagu Jaamicada Göteborg University kulliyadeeda culuunta dhaqaala-ha. Wuxuu kaloo Master degree ka heystaa Jaamicada Injineeriya ee isla jaamicadaas.